



**GUDDIGA MADAXABANNAAN**  
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA  
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور  
**Independent Constitutional Review  
and Implementation Commission**



**GUDDIGA DIB-U-EEGISTA  
IYO LA-SOCODKA  
HIRGELINTA DASTUURKA**

# SOOJEEDINTA

## WAX-KABEDDELKA CUTUBYADA 10AAD ILAA 15AAD EE DASTUURKA KMG

### DIYAARIYEEY:

GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA  
IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

### ANSIXIYEEY:

GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LASOCODKA  
HIRGELINTA DASTUURKA

FEBRAAYO 2026

## ARAR

### Annaga oo ah Dadka Soomaaliyeed,

**ANNAGOO MAANKA KU HAYNA** jiritaankeena taariikhiga ah ee qadiimiga ah ee Geeska Afrika, iyo soo-jiritaanka ilbaxnimadeenna oo ku salaysan nolol-dhaqameed xoolo-dhaqasho, tacabka beeraha, bad-mareenimo, iyo ganacsi, kuwaas oo qarniyo badan isku xiray Afrika, Carabta, iyo dunida inteeda kale;

**ANNAGOO TIXGELINAYNA** taariikhda, isirka, afka, dhaqanka iyo qiyamka ku qotoma Diinta Islaamka oo ah diinta dalka iyo dadka Soomaaliyeed, hodanna ku ah xeer-dhaqameed (xeer), isku-duubni bulsho, ixtiraamka karaamada aadanaha, caddaaladda iyo talo-wadaagga (shuurada);

**ANNAGOO XUSUUSAN** halgankii dheeraa ee looga soo horjeeday gumaysiga, iyo hanashadii gobannimada iyo midnimada sannadkii 1960, halyeeyadii naf iyo maal u huray, iyo mas'uuliyadda ilaalinta madaxbannaanida, midnimada, iyo wadajirka dhuleed ee Dalka;

**ANNAGOO DAREENSAN** dhibaatooyinkii ka dhashay colaadihii daba-dheeraaday iyo burburkii dawladeed, isla markaana adkaynayna go'aankeenna ah in laga gudbo kala-qaybsanaanta iyada oo loo marayo dib-u-heshiisiin, nidaam dastuuri ah iyo sarraynta sharciga;

**ANNAGOO GO'AANSANAY** dhisidda nidaam federaal ah oo dimuqraadi ah oo isla-xisaabtan leh, kuna dhisan rabitaanka

shacabka, axsaab badan, kala-soocidda awoodaha, iyo ixtiraamka xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ah;

**ANNAGOO QIRSAN** kala-duwanaanta gobolladeenna, isla markaana adkaynayna in federaalku yahay midnimo ikhtiyaari ah oo ilaalisa wadajirka qaranka, hubisana is-maamul, matalaad caddaalad ah, iyo qaybsiga awoodda iyo kheyraadka si siman;

**ANNAGOO AAMINSAN** in dhulka, biyaha, hawada iyo kheyraadka dabiiciga ah ee Soomaaliya ay yihiin hanti qaran oo ay wada-leeyihiin jilasha hadda jooga iyo kuwa mustaqbalka in si caddalad ah loo maamulo looguna ilaaliyo;

**ANNAGOO TIXGELINAYNA** goobta istaraatiijiga ah oo ay Soomaaliya dhacdo taas oo ah isgoyska Afrika iyo Bariga Dhexe, kuna teedsan marinno badeed oo muhiim ah, isla markaana go'aansannay in goobtaasi u adeegto nabad iyo barwaaqo wadaag ah;

**ANNAGOO KU TAAMEYNA** horumar caddaalad bulsho, koboca dhaqaale, ilaalinta deegaanka, sinnaanta, iyo ka-qaybgalka buuxa ee dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed;

**ANNAGOO RUMEYSAN** nabad ku wada noolaanshaha dalalka dariska ah iyo ixtiraamka sharciga caalamiga ah;

**SIDAAS AWGEED** waxaan qaadanaynaa oo ansixinay Dastuurkan, si uu u noqdo xeerka ugu sarreeya Dalka, looguna xaqiijiyo xorriyad, caddaalad, nabad iyo barwaaqo, loogana aasaaska dawlad Soomaaliyeed oo midaysan, xasilloon oo dimuqraadi ah.

**CUTUBKA TOBNAAD:  
GUDDIYADA MADAXABANNAAN**

Asalka Dastuurka KMG ah	Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD uuna ansixiyay Guddiga Lasocodka	Faallo:
CUTUBKA 10 AAD: GUDDIYADA MADAXA BANNAAN		Cutubkan waa la tiray, Guddiyada waxaa lagu daray cutubyada ay la xiriiraa, sida hoos ka muuqatay
Qodobka 110aad: Mabaadi'da Guud		Qodobkan waxaa loo raray hadba cutubka uu u abbaaranyahay.
Qodobka 111aad: Samaynta Guddiyada Madaxa Bannaan		Qodobkan waxaa loo raray hadba cutubka uu u abbaaranyahay.
Qodobka 111A: Golaha Adeegga Garsoorka		Qodobkaan waxaa loo raray Cutubka 9aad ee Garsoorka
Qodobka 111B: Guddiga Xuquuqda Aadamiga		Qodobkaan waxaa loo raray Cutubka 2aad ee Dastuurka
Qodobka 111C: Guddiga La dagaalanka Musuqmaasuqa		Qodobkaan waxaa loo raray Cutubka 11aad ee Maaliyadda
Qodobka 111D: Guddiga Adeegga Baarlamaanka		Qodobkan waxaa loo raray Cutubka 6aad ee Barlamaanka.
Qodobka 111E: Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka		Qodobkan waxaa loo raray Cutubka 4aad ee Dastuurka
Qodobka 111F: Guddiga isku xirka Xukuumadaha		Qodobkan nuxurkiisa waxaa loo raray Cutubka 5aad ee Dastuurka

<b>Qodobka 111G: Guddiga Qaranka ee Madax Bannaan ee Doorashooyinka</b>		Qodobkan waxaa loo raray Cutubka 4aad ee Dastuurka.
<b>Qodobka 111H: Guddiga Ammaanka Qaranka</b>		Qodobkan waxaa loo raray Cutubka 12aad ee Dastuurka.
<b>Qodobka 111I: Guddiga Runta iyo dib-u-heshiisiinta</b>		Qodobkan waa la tiray.
<b>Qodobka 111J: Gardoonka/Ilaaliyaha Dadweynaha</b>		Qodobkan waa la tiray
<b>Qodobka 112aad: Magacaabidda Guddiyada Madaxbannaan Heer Federaal</b>		Qodobkan nuxurkiisa waxaa lagu daray cutubyo kala duwan ayadoo habka magacaabista lagu xusay hadba guddiga u abbaaran.
<b>Qodobka 113aad: Shuruucda Guddiyada Madaxa Bannaan</b>		Qodobkan nuxurkiisa waxaa lagu daray cutubyo kala duwan ayadoo shuruucadaha lagu xusay hadba guddiga u abbaaran.
<b>Qodobka 114aad: Xafiisyadda Madaxa Bannaan</b>		Qodobkan nuxurkiisa waxaa lagu daray cutubyo kala duwan ayadoo dhismaha xafiisyada lagu xusay cutubyada kala ee dastuurka sida cutubyada Maaliyadda iyo Gaarsoorka.

**CUTUBKA TOBNAAD:  
SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLADDA**

Asalka Dastuurka KMG ah	Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD uuna ansixiyay Guddiga Lasocodka	Faallo:
Cutubka Kow iyo Tobannaad: Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda	Cutubka Tobnaad: Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda	Cinwaanka Cutubka 10aad ee wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Cutubka 11aad waxba lagama beddelin oo sidiisa ayaa loo qaatay.
Qodobka 115aad: Qiyamka Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka ah	Qodobka 155aad: Qiyamka iyo Mabaadi'da Hagaysa Shaqaalaha Rayidka	Cinwaanka Qodobka 155aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 115aad waxaa laga dhigay “Qiyamka iyo Mabaadi'da Hagaysa Shaqaalaha Rayidka”. Qodobkan oo ka koobnaa hal faqrad waxaa laga dhigay shan faqraddood.
Shaqaada rayidka ee heerarka kala duwan ee xukuumadda waa amaano ummadda loogu adeego waana in ay ku saleysnaataa qiyamka Dastuurka, naxariis, daahfurnaan, u-adeegga bulshada iyo dhawrista ku kala dambeynta darajooyinka maamul, dhegonugayl, sirxajin, asluub-wanaag shaqo, howlkarnimo, waxa-kuool ah, mihnadyahannimo, dhawrista Mabaadi'da caadaaladda, sinnaan iyo habka xilgudashada ugu habboon.	(1) Shaqaalaha Rayidka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa amaano ummadda loogu adeego, waxaa hagaya mabaadi'da daacadnimo, naxariis, xirfad-yaqaannimo, karti, dhexdhexaadnimo, daahfurnaan, dhegonugayl, sirxajin, asluubwanaag shaqo, howlkarnimo, wax-kuool ah, isla xisaabtan, wadajir, sinnaan, caddaalad, dhawrista ku kala dambeynta darajooyinka maamul iyo u adeegidda danaha dadweynaha.	<b>Faqradda 1aad:</b> Faqraddan waxaa lagu sameeyey dib-u-siiqeyn, ayadoo loo kala qaaday dhowr faqraddood, waxayna tilmaamaysaa qiyamka iyo mabaadi'da Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda. Waxaana lagu soo kordhiyey mabaadi' dheeraad ah oo ay ka mid yihiin: “daacadnimo, xirfadyaqaannimo, karti, dhexdhexaadnimo.
	(2) Xilka dawladeed waa mas'uuliyad dadweyne, waxaana waajib ku ah Shaqaalaha Rayidka ah in ay xilalkooda u gutaan si	<b>Faqrad cusub:</b>

	waddaninnimo leh, daacadnimo iyo ixtiraam buuxana u haya Dastuurka iyo xeerarka dalka.	Faqraddan waxay faraysaa in shaqaaluhu xilalkooda u gutaan si waddaninnimo leh, daacadnimo iyo ixtiraam buuxana u haya Dastuurka iyo xeerarka dalka.
	(3) Shaqaalaha Rayidka ah waa in ay metelaan dhammaan bulshada Soomaaliyeed, iyada oo si gaar ah loo tixgelinayo dadka naafada ah.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in ay shaqaalaha matelaan dhammaan bulshada Soomaaliyeed.
	(4) Maamulka guud ee dawladda waa inuu noqdaa mid ku jihaysan horumarin, bulsho u adeegid, kuna dhisan caddaalad iyo sinnaanta adeeg bixinta.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in ujeedka maamulka guud uu noqdo mid ku jihaysan horumarin iyo sinnaanta adeeg bixinta.
	(5) Shaqaalaha Rayidka ah waa in ay ka fogaadaan fal kasta oo musuqmaasuq iyo adeegsiga awoodda xilkiisa si baalmarsan xeerka iyo anshaxa.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay faraysaa in shaqaalaha rayidka ah ka fogaadaan musuqmaasuq iyo falka kasta aan habboonayn.
	<b>Qodobka 156aad: Baaxadda iyo Qaabdhismeedka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	(1) Shaqaalaha Rayidka ah waxa ka mid noqonaya dhammaan shaqaalaha joogtada ah oo ku hawlan maamulka guud iyo bixinta adeegyada, waxayna ka koobnaanayaan: (a) Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Federaalka; iyo (b) Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawlad Goboleedyada.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa qaabdhismeedka Shaqaalaha Rayidka ah oo loo kala qaybiyay: Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Federaalka; iyo Shaqaalaha Rayidka ee Dawlad Goboleedyada.

	(2) Shaqaalaha Rayidka ah waxay ku shaqeynayaan hannaan midaysan oo xeer iyo anshaxba leh.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa baaxadda shaqaalaha rayidka.
	(3) Waxaa la dhisayaa Guddiyo Madaxbannaan oo Shaqaalaha Rayidka heer Dawlad Goboleed. Guddiyadan waxay maamulayaan arrimaha shaqaalaha rayidka ee heer Dawlad Goboleed, iyagoo raacaya xeerarka la dejiyey.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in guddiyada heer Dawlad Goboleed maamulayaan arrimaha shaqaalaha rayidka ee Dawlad Goboleedyada.
	<b>Qodobka 157aad: Dhismaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Federaalka</b>	<b>Qodob Cusub</b>
	(1) Waxaa la dhisayaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Federaalka oo madaxbannaan una xilsaaran maamulka iyo maaraynta shaqaalaha rayidka ah.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxaa lagu xeerinayaa dhismaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Federaalka.
	(2) Guddigu wuxuu sannad kasta u soo gudbinayaa warbixin ku saabsan hawlihiisa iyo waxqabadkiisa Baarlamaanka Federaalka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Guddigu uu warbixin sanadle ah u gudbinayo Baarlamaanka FS.
	(3) Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Federaalka wuxuu ka kooban yahay shan iyo tobon (15) xubnood, oo uu soojeediyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa xubnaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Federaalka.
	(4) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Kuxigeenka Guddiga waxaa iska dhexdooranaya xubnaha guddiga.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in Guddoonka ay iska dhexdooranayaan.
	(5) Xeer uu soo saara Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa faahfaahinaya shuruudaha xubnaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Federaalka iyo habka xilka ay ku waayi karaan.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay qeexaysaa in u jirayo xeer uu soo saarayo BFS si

		loogu faahfaahiyo arrimaha uu dastuurka uu u dajiyey mabaadi'da guud.
	(6) Xubnaha Guddiga waxa ay xilka haynayaan muddo shan (5) sano ah oo la cusboonaysiin karo seddex jeer.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinayaa muddada xilhaynta xubnaha guddiga
	<b>Qodobka 158aad: Waajibaadka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Federaalka</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	Waajibaadka Guddiga waxaa kamid ah:	<b>Faqrad cusub:</b>
	(a) Sugidda hannaanka qorista, dallacsiinta, anshaxmarinta iyo ilaalinta akhlaaqda shaqaalaha oo ku salaysan karti, tartan furan, iyo daahfurnaan;	Faqraddan waxay xeerinaysaa waajibaadka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Federaalka.
	(b) Diyaarinta iyo dhaqangelinta xeerarka anshaxa shaqaalaha rayidka ah;	
	(c) Dhiirrigelinta sinnaanta qaybaha bulshada ee hannaanka shaqa qorista;	
	(d) Maamulidda iyo hirgelinta horumarka xirfadeed, tababbarka, iyo qiimeynta waxqabadka shaqaalaha;	
	(e) Baaridda cabashooyinka, khaladaadka anshaxeed iyo dacwadaha shaqaalaha; iyo baaritaanka arrimaha waxqabadka shaqaalaha rayidka ah;	
	(f) Talo siinta dawladda ku aaddan dib-u-habeeynta adeegga rayidka ah iyo horumarinta siyaasadaha la xiriira;	
	(g) Xiriirka Guddiyada Heer Dawlad Goboleed iyo hay'adaha caalamiga ah; iyo	
	(h) In uu fuliyo hawl kasta ee kale, oo la xiriirta arrimaha shaqaalaha rayidka ah, oo ku xusan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	

<b>Qodobka 116aad: Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka ah</b>	<b>Qodobka 159aad: Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka ah</b>	Qodobkan oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 116aad waxaa soojeedinta laga dhigay Qodobka 159aad, Cinwaankiisana waxba iskama beddelin.
	(1) Shaqaalaha rayidka ah wuxuu xaq u leeyahay doorashada shaqada xirfadeedada uu leeyahay, mushaar caddaalad ah, badqabka goobta shaqada, hawlgab sharci ah iyo difaac bulsho si waafqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa xuquuqda shaqaalaha rayidka ah sida mushaar, badqabka goobta shaqada, hawlgab sharci.
	(2) Shaqaaluhu waxa ay xaq u leeyihiin inay is uruursadaan, wadahadlaan, iyo inay helaan habab ay cabashooyin u gudbiyaan.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa xaqqa shaqaalaha oo ah in ay is uruursadaan.
Shaqaalaha rayidka ah lagulama kici karo: (a) Bahdilid waajibaadkooda shaqo ay gudanayaan awgood.	(3) Shaqaalaha rayidka ah laguma sameyn karo arrimaha soo socda: (a) Is hortaag asagoo gudanaya waajibaadkiisa shaqo; (b) Xilkaqaadid, darajodhimis haddii aysan jirin sabab sharciyeed oo caddaalad ah, loona marin nidaam sugan oo uu shaqaaluhu xaq u leeyahay in la maqlo. (c) Waa in loo maraa habraaca anshaxmarinta shaqaalaha rayidka ah hab waafaqsan xeerka shaqaalaha.	Faqraddan waxay tilmaamaysaa arrimaha aan lagu samey karin shaqaalaha rayidka ah.
(b) Laguma sameyn karo xilkaqaadid, lagama wareejin karo xafiiska, darajadooda hoos loomadhihi karo, inay jirto sabab maangal ah oo sharci ku dhisan.	(4) Shaqaalaha rayidka ah waa in laga ilaalinayo faragelin siyaasadeed ama aargoosi ka dhasha gudashada xilalkooda.	Faqraddan waxay reebayaa faragelinta siyaasadeed ama aargoosi ka dhasha xilalkooda sharxiyeed.
	(5) Shaqaalaha rayidka ah waa in la ilaaliyaa xogtooda shaqo iyo sirta shaqsiga ah iyadoo loo marayo xeerarka dalka.	<b>Faqrad cusub:</b>

		Faqraddan waxay xeerinaysaa ilaalinta xogtooda iyo sirta shaqsiga ah.
<b>Qodobka 117aad: Magacaabista Saraakiisha Darajooyinka Sare</b>		<b>Qodobkan waa la tiray:</b>
Hawlwadeennada iyo Saraakiisaha darajooyinka sare ee Dawladda uu sharcigu tilmaamo waxaa magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, ka dib markuu arko soo jeedinta Golaha Wasiirrada.		Nuxurkiisa lagu xusay Qodobka 114aad ee ka hadlaya Awoodaha Madaxweynaha JFS.
<b>Qodobka 118aad: Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha Dawladda</b>		<b>Qodobkan waa la tiray:</b>
(1) Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha Dawladdu waxay xilkooda u gudanayaan si waafaqsan sharciga iyo danta guud oo keliya.		Nuxurkiisa waxaa lagu daray qodobbada hore ee wax-kabedelka Dastuurka ee isla cutubkaan.
(2) Hawlwadeennada iyo shaqaalaha Dawladdu kama mid noqon karaan hoggaamiyayaalka xisbiyada siyaasadda.		
(3) Waa in Sharci lagu xaddidaa qaybaha shaqaalaha Dawladda ee ka reebban in ay xubno ka noqdaan axsaab siyaasadeed iyo hawlaha aan la socon karin xilalka ay hayaan.		
(4) Xaaladda qaanuun ee shaqaalaha Dawladda waxaa nidaaminaya sharciga.		
(5) Shaqada joogtada ah ee Dawladda, waxaa looga mid noqon karaa tartan furan oo		

keliya, marka laga reebo xaaladaha sharcigu tilmaamay.		
<b>Qodobka 119aad: Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka ah</b>	<b>Qodobka 160aad: Shaqo Qoridda, Magacaabidda iyo Dallacsiinta Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda</b>	Qodobkan oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 119aad waxaa soojeedinta laga dhigay Qodobka 160aad, cinwaankiisana waxaa laga dhigay “Shaqo Qoridda, Magacaabidda iyo Dallacsiinta Shaqaalaha Rayidka”
(1) Xukuumadda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxay shaqaalasanayaan hawl-wadeennadooda.	(1) Shaqaalaysiinta shaqaalaha rayidka waxa ay ku salaysan tahay karti, tartan furan, aqoon, iyo sinnaan fursadeed.	Faqraddan waxay xeerinaysaa in ay noqoto shaqo qorista mid ku dhisan karti, tartan furan, aqoon iyo sinnaan fursadeed.
	(2) Dallacsiintu waa in ay ku salaysnaataa waxqabadka shaqsiyeed, anshaxa xirfadeed, waaya-aragnimada, iyo nidaamka horumarinta shaqada oo ay dejiyeen xeerarku.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa in dallacsiintu ay ku sallaysnaato waxqabadka shaqsiyeed, anshaxa xirfadeed, waayo-aragnimada,
	(3) Qorista iyo dallacsiinta waa in ay noqdaan kuwo kor u qaadaya metelaad caddaalad ah oo leh dheelitirnaan dadka Soomaaliyeed, ayadoo mudnaan la siinayo haweenka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa qorista iyo dallacsiinta shaqaalaha ay noqoto mid u furan dhammaan qaybaha bulshada.
	(4) Shaqooyinka bannaan waa in loo soo bandhigaa oo loo xayeysiyyaa si furan oo dadweynaha ay ugu tartami karaan iyadoo lagu daabacayo warbaahinta iyo bogagga rasmiga ah ee dawladda.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminaysaa hannaanka shaqa qorista loo soo bandhigayo.
	(5) Dawladda Federaalka waxay soo saaraysaa xeerarka, siyaasadaha iyo halbeegyada shaqaalaha rayidka ee Dawladda ee heer federal iyo heer Dawlad Goboleed, kaa soo lagu	<b>Faqrad cusub:</b>

	salaynayo mabaadi'da iyo halbeegyada caalamiga ah ee shaqaalaha.	Faqraddan waxay xeerinaysaa in Dawladda Federaalka ay soo saarayso xeerarka iyo siyaasadaha.
(2) Waxaa jiraya Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka ah ee Heer Federaal iyo Heer Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka, waxaana lasoo saarayaa xeer nidaaminaya oo waafaqsan shuruucda caalamiga ah ee shaqaalaha oo ay soo saarayaan Golaha Shacabka ee Federaalka iyo golaha sharci dejinta ee Dawladaha xubnaha ka ah Federaalka.	(6) Dawlad Goboleedyadu waxay dejiisanayaan xeerka shaqaalaha rayidka ee dawladdooda si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Federaalka Soomaaliya.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysa in Dawlad goboleedyadu ay lahaanayaa xeerarkooda shaqaalahooda rayidka.
(3) Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah waxay iska kaashanayaan ka wada faa'ideysiga hawl-wadeennada heerarka kala duwan, si loo xaqiijiyo khibradda iyo waayo-aragnimadu in ay noqdaan mid laga heli karo heer kasta oo looga baahan yahay, iyada oo taasna lagu horumarinaayo midnimada qaranka.		<b>Faqraddan waa la tiray:</b> Faqraddan nuxurkeeda waxaa lagu daray cutubkan qodobbadiisa.
(4) Shaqaalaha rayidka ee Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka waa inay ka muuqataa dheelitirnaan dadka wada deggan.		<b>Faqraddan waa la tiray:</b> Faqraddan nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 3aad ee isla qodobkan.
	<b>Qodobka 161aad: Anshaxa iyo Isla Xisaabtanka</b>	<b>Qodob Cusub</b>
	(1) Shaqaalaha Rayidka ah waa inay ku dhaqmaan qiyamka anshaxa oo ay ka mid yihiin dhexdhexaadnimo, ilaalinta sirta shaqada, ku dhaqanka xeerarka iyo ka fogaanshaha is-diiddo daneed, eex iyo qof jecleysi.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in shaqaalaha rayid ah ay ku fuliyaan xeerarka anshaxa

		dhexdhexaadnimo, ilaalinta sirta shaqada, ku dhaqanka sharciga, iyo ka fogaanshaha is-diiddo daneed
	(2) Shaqaalaha Rayidka ah waa inay si joogto ah u muujiyaan macluumaadka la xiriira is-diiddo daneed iyo xiriir kasta oo saamayn kara go'aammadooda.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay faraysaa shaqaalaha rayidka ah in uu sheego arrimaha is-diiddo daneed.
	(3) Ku xadgudubka anshaxa waxa lagu mutaysan karaa ciqaab anshaxeed oo ku salaysan hannaan caddaalad, daahfurnaan, iyo xaq u lahaanshaha isdifaac.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysa in jabinta anshaxa uu ka dhalanayo anshax marin.
	(4) Shaqaalaha rayidka ah ee si daacadnimo leh u soo sheega ku-xadgudubka xeerka ama anshaxa waa in si sharci ah loo ilaaliyo.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa ilaalinta shaqaalaha rayidka ee soo sheegay ku xadgudubka xeerka ama anshaxa.
	<b>Qodobka 162aad: Tababbarka iyo Iskaashiga heerarka dawladda</b>	<b>Qodob cusub</b>
	(1) Dawladda Federaalka waxa ay dhisaysaa Machadka Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka oo bixin doona tababbar waajib ah iyo horumarinta xirfadaha shaqaalaha heer kasta.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa dhisidda Machadka Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka
	(2) Machadka Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka ah waxa uu sameyn doonaa qiimeyn sanadeed lagu ogaanayo baahiyaha tababbarka iyo horumarinta xirfadaha shaqaalaha rayidka ah.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Machadka Qaranka uu sameynayo qiimayn sanadeed.
	(3) Machadku waxa uu iskaashi la yeelanayaa xarumaha tababbarka ee heer gobol iyo kuwa caalami ah.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Machadku uu la yeelan kaor karo

		iskaashi xarumaha tababarka ee heer caalami iyo heer gobolba.
	(4) Dawladda Federaalka iyo Dawladaha Goboleedyada waxay iska kaashanayaan ka wada faa'ideysiga hawlwadeennada heerarka kala duwan, si loo xaqiijiyo khibradda iyo waayo-aragnimadu in ay noqdaan mid laga heli karo heer kasta oo looga baahanyahay, iyada oo taasna lagu horumarinayo midnimada qaranka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqradan waxay qeexaysaa in loo baahanyahay in Guddiyadu iska kaashadaan ka wada faa'iidsida hawlwadeennada heerarka kala duwan duwan

**CUTUBKA LABA IYO TOBNAAD:  
DAWLADAHA XUBINTA KA AH DAWLADDA FEDERAALKA**

Asalka Dastuurka KMG ah	Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD uuna ansixiyay Guddiga Lasocodka	Faallo:
CUTUBKA 12AAD: DAWLADAHA XUBINTA KA AH DAWLADDA FEDERAALKA		Cutubkan waa la tiray, nuxurkiisa waxaa lagu daray Cutubka 5aad ee Dastuurka.
<b>Qodobka 120aad. Hay'adaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka</b>		Qodobkan waxaa loo raray Cutubka 5aad ee Dastuurka Madaxiisa 3aad.
Dhismaha laamaha sharcejinta iyo fulinta ee maamulada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waa arrimo lagu nidaaminayo Dastuurrada maamul-goboleedyada.		
<b>Qodobka 121aad. Mabaadi'da Dastuurrada</b>		Qodobkan waxaa loo raray Cutubka 5aad ee Dastuurka Madaxiisa 3aad.
Mabda'iyan waa in la iswaafajiyaa Dastuurka Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dastuurada Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka		

**CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD:  
NIDAAMKA MAALIYADDA GUUD**

Asalka Dastuurka KMG ah	Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD uuna ansixiyay Guddiga Lasocodka	Faallo:
Cutubka Saddex iyo Tobonnaad: Maaliyadda Guud	Cutubka Kow iyo Tobnaad: Nidaamka Maaliyadda Guud	Cinwaanka Cutubkan oo asalka Dastuurka ahaa “Maaliyadda Guud” waxaa laga dhigay “Nidaamka Maaliyadda Guud”.
Qodobka 122aad: Mabaadii’da Maaliyadda Guud	Qodobka 163aad: Mabaadii’da Maaliyadda Guud	Cinwaanka Qodobka 163aad ee waxkabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 122aad waxba lagama beddelin.
Mabaadiida Guud ee Maaliyadda waxaa ka wada xaajoon doona Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ah Dawladda Federaalka si waafaqsan qaab Dastuuri ah.	Si loo xaqiijiyo nidaam maaliyadeed oo hufan, caddaalad ah, isla markaana waafaqsan qaabdhismeedka Federaalka, dhaqangelinta siyaasadda iyo nidaamka maaliyadeed ee dalka waxaa hagaya mabaadi’ guud ee soo socda oo mideeya aragtida iyo dhaqanka maamulka maaliyadda qaranka:	Qodbkan waxa uu xeerinayaa mabaadi’da hagaysa Maaliyadda Guud. Asalka Dastuurka waxaa lagu sheegay in ay ka wada xaajoon doonaan Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada. Golaha Wadarashiga Qaranka ayaa heshiis siyaasadeed ka gaaray “Federaalaynta Maaliyadda” oo ku saabsan “Astaynta Awoodaha iyo Wadaagga Dakhliga” oo la bishii Maarso 2023.
	(1) Qaybinta awoodaha maaliyadeed iyo canshuuraha waa in lagu saleeyaa nidaam maaliyadeed oo dheellitiraya heerarka kala duwan ee dawladda, si loo xaqiijiyo in adeegyada iyo dakhliga loo qaybiyo si waafaqsan baahida iyo awoodda fulinta.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxa ay xeerinaysaa habka loo maareynayo qaybinta awoodaha maaliyadeed iyo canshuuraha ee heerarrka kala duwan ee dawladda.

	(2) Mas'uuliyadda bixinta adeegyada iyo fulinta hawlaha maaliyadeed waa in lagu meeleyaa hay'adda dawladda ee ugu dhow shacabka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay dejinaysaa mabda'a ku salaysan ku dhowaanshaha shacabka marka la fulinayo hawlaha maaliyadeed.
	(3) Muwaaddiniinta dhammaan gobollada iyo degaannada dalka waxay xaq u leeyihiin adeegyo iyo fursado maaliyadeed oo siman, iyadoo aan loogu kala eexanayn deegaan ama xaalad dhaqaale.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xaqiijinaysaa sinnaanta muwaaddiniinta ee helitaanka adeegyada iyo fursadaha maaliyadeed. Waxay mamnuucaysaa takoor ku salaysan deegaan, qabiil ama xaalad dhaqaale.
	(4) Qorsheyaasha iyo siyaasadaha maaliyadeed waa in lagu saleeyaa mabda'a sinnaanta jilalka si aan kheyraadka iyo deymaha loogu xadgudbin mustaqbalka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay ku salaysan tahay mabda'a sinnaanta jilalka, taas oo micnaheedu yahay in qorshayaasha maaliyadeed lagu saleeyo ilaalinta danaha jilasha mustaqbalka.
	(5) Kala duwanaanshaha awoodaha, kheyraadka iyo mas'uuliyadaha ee heerarka dawladeed waa la aqbali karaa, si loo suurtageliyo in Dawlad Goboleedyadu yeeshaan xad u gaar ah oo ku habboon xaaladdooda dhaqaale iyo bulsho.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay aqoonsanaysaa in heerarka kala duwan ee dawladda ay yeelan karaan kala duwanaansho ku saabsan awoodaha, kheyraadka iyo mas'uuliyadaha. Kala duwanaanshahan waa mid la oggol yahay si loo tixgeliyo duruufaha dhaqaale iyo bulsho ee Dawlad Goboleedyada.

	(6) Heer kasta oo dawladeed waa inuu qaataa mas'uuliyadda dhaqaale iyo canshuureed ee ku waajibta, si looga fogaado xaalad cid gaar ahi ay ka faa'iidaysto adeegyada qaranka iyada oo aan wax ka bixin kharashka ama canshuurta ku aaddan.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay adkaynaysaa mabda'a mas'uuliyadda maaliyadeed. Heer kasta oo dawladeed waa inuu qaadaa waajibaadka dhaqaale ee ku aaddan hawlaha loo igmaday.
	(7) Heer kasta oo dawladeed wuxuu awoodihiisa maaliyadeed u adeegsanayaa si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka, isagoo ilaalinaya xasilloonida dhaqaalaha iyo horumar waara.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay ku waajabinaysaa heer kasta oo dawladeed in uu awoodihiisa maaliyadeed u adeegsado si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka. Adeegsiga awoodahaas waa inuu dhowraa xasilloonida dhaqaalaha iyo nidaamka sharci.
	(8) Heer kasta oo dawladeed wuxuu mas'uul ka yahay kharashaadka hawlaha uu Dastuurka Federaalka u xilsaaray.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in heerarka dawladda mid kasta mas'uul ka yahay kharashka hawlaha Dastuurku u xilsaaray.
	(9) Haddii hawl Federaal loo wareejiyo Dawlad Goboleed, kharashka lagu fulinayo waxa bixinaya heerka dawladda ee hawsha leh, haddii aan si kale lagu heshiin.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Dawladda Federaalku bixinayso kharashka haddii ay hawl ay leheed u wareejiyo Dawlad Goboleed.
	(10) Qeybinta mas'uuliyadda kharashka waxa hagaya mabda'a ah in hawlaha adeegyada bulshada ay gaarsiisan yihiin heerka dawladeed ee ugu dhow muwaadiniinta.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa mabda'a ah in in hawlaha adeegyada

		ay gaarsiisanyihiin heerka ugu dhow shacabka.
	(11) Dhammaan hannaanka maaliyeed ee dalka waa in uu ku dhisanyahay nidaamka Koontada Midaysan ee Qasnadda Dawladda.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa hannaan maaliyaadeed ee lacag qabashadu waa in ku dhisan nidaamka Koontada Midaysan ee Qasnadda
	<b>Qodobka 164aad: Awoodaha Maaliyadda ee Heerarka Dawladda</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	(1) Dawlad Federaalka Soomaaliya waxay leedahay awoodaha maaliyadeed ee gaarka ah ee ku xusan jadawalka (2A) ee astaynta awoodaha heerarka kala duwan.	<b>Faqrad cusub:</b> Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay leedahay awood maaliyadeed u gaar ah oo ku saabsan: a) Canshuuraha kastamka, xuduudaha iyo ganacsiga caalamiga ah. b) Canshuuraha dakhliga shirkadaha waaweyn ee heer qaran iyo kuwa caalamiga ah. c) Canshuuraha tubaakada, buuriga iyo alaabooyinka kale ee uu Baarlamaanka Federaalka ku soo rogo cashuuraha gaarka ah; d) Canshuurta Moorka heer federal (Stamp duty in federal level) e) Canshuurta waddo-marista, qeybta waddooyinka u kala goosha Dawlad Goboleedyada;

		<p>f) Canshuurta Faa'iidada raasumaalka (Capital Gains) ee laga helo iibka ama maalgashiga;</p> <p>g) Dakhliga ka soo xarooda kheyraadka dabiiciga ah</p> <p>h) Khidmadaha kale ee gaar ah oo uu jideeyey xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka; iyo</p> <p>i) Deeqaha caalamiga ah iyo amaahda dibedda ama gudaha ee magac Dawladda Federaalka lagu helo.</p>
	<p>(2) Dawlad Goboleedyadu waxay yeelanayaan awoodaha maaliyadeed ee u gaarka ah ee ku xusan jadwalka (2C) ee astaynta awoodaha heerarka kala duwan.</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b> Dawlad Goboleedyadu waxay leeyihiin awoodaha soo socda:</p> <p>a) Canshuuraha dhulka, hantida maguurtada ah iyo isticmaalka dhulka.</p> <p>b) Canshuurta Moorka ee heer Dawlad oboleed (stamp duty in a state level).</p> <p>c) Canshuurta kala wareejinta hantida;</p> <p>d) Khidmadaha dhulbeereedyada iyo suuqyada ku yaalla dawlad goboleedyada.</p> <p>e) Canshuurta wadda-marista ee heer dawlad goboleed;</p> <p>f) Khidmada ruqsadda wadista gaadiidka, (Driver's license);</p>

		<p>g) Khidmadda ruqsadda summada gaadiidka, (Plate Numbers)</p> <p>h) Lacagaha iyo khidmadaha adeega bulshada ee gobolka ama degmada.</p> <p>i) Dakhliga laga helo maalgashiga iyo adeegyada ganacsiga ee dawlad goboleedka.</p>
	<p>(3) Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyadu waxay leeyihiin awoodo maaliyadeed oo wadaag ah ee ku xusan jadwalka (2B) ee astaynta awoodaha heerarka kala duwan.</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b> Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyadu waxay leeyihiin awoodo maaliyadeed oo wadaag ah:</p> <p>a) Canshuurta gadista/iibka;</p> <p>b) Canshuuraha macaashka shakhsiga;</p> <p>c) Canshuurta Macaashka guryaha (Rental Income tax);</p> <p>d) Canshuurta Macaashka Shirkadaha (Corporate Income Tax);</p> <p>e) Khidmadaha Mihnadaha/Karaanka;</p> <p>f) Canshuurta diiwaangalinta qaansheegadka iyo heshiisyada (other stamp duties).</p>
	<b>Qodobka 165aad: Hay'adda Dakhliga Qaranka</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	<p>(1) Waxaa la dhisayaa Hay'adda Dakhliga Qaranka oo ah hay'ad madaxbannaan oo heer federaal ah;</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay aasaasaysaa Hay'adda Dakhliga Qaranka oo ah hay'ad federaal ah oo</p>

		madaxbannaan. Waxay qeexaysaa in hay'addu mas'uul ka tahay ururinta,
	(2) Hay'addu waxay mas'uul ka tahay ururinta iyo maamulka dakhliga Dawladda Federaalka, waxayna ku shaqaynaysaa mabaadi'da hoos ku xusan: <ul style="list-style-type: none"> <li>a) Sare u qaadidda dakhliga guud ee dalka iyo ballaarinta ilaha dakhli;</li> <li>b) Xoojinta midnimada qaranka iyo wadaagga kheyraadka;</li> <li>c) Sare u qaadidda hufnaanta hab-ururinta dakhliga ayadoo la adeegsanayo casriyeyn, danabayn iyo hab kasta oo fududaynaya hawsha iyo ammaankeeda;iyo</li> <li>d) Wacyigelinta shacabka ee ku saabsan waajibaadka canshuur bixinta.</li> </ul>	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay taxaysaa mabaad'iida ay hay'addu ku shaqayn doonto oo ay kamid yihiin kor u qaadidda dakhliga guud ee dalka, xoojinta midnimada qaranka iyo sare u qaadidda hufnaanta han-ururrinta dakhliga.
	(3) Hay'addu waa inay la shaqaysaa hay'adaha maaliyadeed ee heer federaal iyo heer Dawlad Goboleed, si loo xaqiijiyo isku-xirnaanta iyo caddaaladda nidaamka dakhli ururinta.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay ku waajibinaysaa hay'adda inay la shaqayso hay'adaha maaliyadeed ee heer federaal iyo heer Dawlad Goboleed. Ujeeddadu waa in la xaqiijiyo isku xirnaan, is waafajin iyo caddaalad ku jirta nidaamka dakhliga.
	(4) Soo rogista, dhimista canshuuraha ama cafiska waa in lagu saleeyaa xeer Baarlamaanka Federaalku soo saaro.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xaddidaysaa dhimista ama cafiska cashuuraha. Cashuur kasta oo la dhimayo ama la cafinayo waa inay ku salaysnaataa xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka.

	(5) Dhammaan dakhliga ay ururiso ama hesho Dawladda Federaalka waa in lagu shubaa Sanduuqa Guud, marka laga reebo lacagaha loo qoondeeyo ujeeddo gaar ah si waafaqsan xeerarka dalka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xaddidaysaa dhimista ama cafiska cashuuraha. Cashuur kasta oo la dhimayo ama la cafinayo waa inay ku salaysnaataa xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka
	(6) Qaabdhismeedka, awoodaha, hawlaha, habraaca shaqada ee Hay'adda Dakhliga Qaranka waxaa lagu qeexayaa xeer gaar ah oo uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa in qaab dhismeedka, awoodaha, hawlaha iyo habraacyada shaqo ee Hay'adda Dakhliga Qaranka lagu qeexi doono xeer gaar ah oo uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.
	<b>Qodobka 166aad: Guddiga Qoondaynta iyo Dardargelinta Dakhliga</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	(1) Waxaa la dhisayaa Guddiga Qoondaynta iyo Dardargelinta Dakhliga, oo ah hay'ad dastuuri ah oo madaxbannaan, mas'uulna ka ah dejinta qaaciddada qaybinta dakhliga qaranka iyo kormeerka fulinteeda.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay aasaasaysaa Guddiga Qoondaynta iyo Dardargelinta Dakhliga oo ah hay'ad dastuuri ah oo madaxbannaan. Guddigu wuxuu mas'uul ka yahay dejinta qaaciddada lagu qaybinayo dakhliga qaranka iyo kormeerka fulinteeda.
	(2) Guddigu wuxuu ku shaqaynayaa mabaadi'da hoos ku xusan: a) Qoondayn ku saleysan qaaciddo cilmiyeed iyo sinnaanta maaliyadeed;	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay dejinaysaa mabaadi'da hagaya shaqada Guddiga. Qoondayntu waa inay ku

	<p>b) Tixgelinta baahiyaha gaarka ah ee Dawlad Goboleedyada iyo deegaannada nugul;</p> <p>c) Qoondaynta kheyraadka dabiiciga ah iyo dakhliga qaranka si waafaqsan Dastuurka;</p> <p>d) Korjoogtaynta iyo hubinta fulinta qoondooyinka; iyo</p> <p>e) Xoojinta wadashaqaynta Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada.</p>	<p>salaysnaataa qaacido cilmiyeed iyo sinnaanta maaliyadeed, ayadoo la tixgelinayo baahiyaha gaarka ah ee Dawlad Goboleedyada iyo deegaannada nugul. Qaybinta khayraadka iyo dakhliga waa inay waafaqsanaataa Dastuurka, guddiguna waa inuu kormeeraa fulinta qoondooyinka isla markaana xoojiyo wada shaqaynta heerarka dawladda.</p>
	<p>(3) Talooyinka Guddiga waa waajib ay tahay in la raaco, waxaana lagu diidi karaa oo keliya haddii Baarlamaanka Federaalka uu ku diido cod aqlabiyad ah.</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay siinaysaa talooyinka guddiga awood sharci oo xooggan. Talooyinka waa in la raaca, waxaana lagu diidi karaa oo keliya haddii Baarlamaanka Federaalka ah uu ku diido cod aqlabiyad ah.</p>
	<p>(4) Qaabdhismeedka, waajibaadka, tirada xubnaha, hawlaha, xubinnimada, habraaca dejinta qaacidada qoondaynta iyo habraaca shaqada ee Guddiga waxaa lagu faahfaahin doonaa xeer gaar ah oo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ansixiyo.</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay sheegaysaa in faahfaahinta qaab dhismeedka, waajibaadka, xubinnimada iyo habraacyada shaqo ee guddiga lagu nidaamin doono xeer gaar ah oo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya soo saaro.</p>
	<b>Qodobka 167aad: Amaahda iyo Daynta Dawladda</b>	<b>Qodob cusub</b>
	<p>(1) Dawladda Federaalka oo keliya ayaa awood u leh gelidda heshiisyada khuseeya amaahda caalamiga ah, ayadoo raacaysaa</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b></p>

	mabaadi'da iyo habraacayada maaliyadeed ee ku xusan xeerarka dalka.	Faqraddan waxay si gaar ah ugu koobaysaa Dawladda Federaalka gelidda heshiisyada amaahda caalamiga ah. Federaalka ayaa ku matalaya Jamhuuriyadda marka la qaadayo deyn dibadeed, wuxuuna qaadaya masuuliyadda sharci iyo mid maaliyadeed.
	(2) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa ansixinayaa xeer qeexayaa siyaasadda guud ee amaahda iyo deynta dawladda. Halka Dawlad Goboleedyadu ay dejin karaan xeerar aan ka hor imanayn xeerarka federaalka..	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in u BFS uu soo saarayo xeer qeexaya amaahada iyo daymaha dawladda.
	<b>Qodobka 168aad: Odoroska Miisaaniyadda Dawladda Federaalka</b>	<b>Qodob cusub:</b>
	(1) Dawladda Federaalka waa inay sanad kasta Baarlamaanka Federaalka u soo gudbisaa miisaaniyad dhammaystiran oo qeexaysa dhammaan dakhliga iyo kharashka la filayo ee sanad maaliyadeedka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay ku waajibinaysaa Dawladda Federaalka inay sanad kasta Baarlamaanka u soo gudbiso miisaaniyad dhammaystiran oo qeexaysa dhammaan dakhliga iyo kharashka la filayo ee sanad maaliyadeedka.
	(2) Miisaaniyadda Dawladda Federaalka waa inay ku jirtaa qayb muujinaysa saamiga la siinayo Dawlad Goboleedyada.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay dhigaysaa in miisaaniyadda Federaalka ay ku jirto qayb si gaar ah u muujinaysa saamiga la siinayo Dawlad Goboleedyada.

	(3) Miisaaniyadda Federaalka waa in la horgeeyo Baarlamaanka ugu yaraan saddex (3) bilood ka hor inta aan sanad maaliyadeedku billaaban.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay dejinaysaa waqti cayiman oo miisaaniyadda lagu horgeynayo Baarlamaanka, ugu yaraan saddex bilood ka hor bilowga sanad maaliyadeedka.
	(4) Dawlad Goboleed kasta waa inay sanad kasta Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka u soo gudbisaa miisaaniyad sanadle ah oo dhammaystiran, si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka federaalka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay waajibinaysaa in Dawlad Goboleed kasta sanad kasta u gudbiso Golaha Wakiillada miisaaniyad dhammaystiran.
	<b>Qodobka 169aad: Xisaab-xirka</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	(1) Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyadu waa inay si joogto ah warbixin uga siiyaan Baarlamaanka Federaalka iyo Golayaasha Wakiillada iyo dadweynaha ku saabsan kharashka la bixiyay marka loo eego miisaaniyadda la ansixiyay.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay waajibinaysaa in Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyadu si joogto ah uga warbixiyaan fulinta miisaaniyadda, ayagoo u gudbinaya Baarlamaanka Federaalka, Golayaasha Wakiillada iyo dadweynaha xog ku saabsan kharashka la bixiyay marka loo eego miisaaniyadda la ansixiyay.
	(2) Warbixinada maaliyadeed kaddib ansixinta Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in la daabacaa, si loo xaqiijiyo daafurnaanta, isla xisaabtanka loona helo kalsooni bulsho iyo ilaalinta dhaqaalaha qaranka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay sheegaysaa in warbixinnada maaliyadeed si joogto ah loo daabaco.
	<b>Qodobka 170aad: Iibsiga Guud iyo Ka-dhimista</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	(1) Iibsiga guud iyo ka-dhimista hantida qaranka waa in lagu saleeyaa mabaadi'dan: a) Tartan xor ah iyo furnaan;	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay dejinaysaa mabaadi'da hagaya iibsiga guud iyo

	<ul style="list-style-type: none"> <li>b) Daahfurnaan iyo hufnaan;</li> <li>c) Adeegsiga kheyraadka si waafaqsan danta guud;</li> <li>d) Ka hortagga musuqmaasuqa iyo ku tagrifalka awoodda;</li> <li>e) Ka maran eex iyo qof jecleysi.</li> </ul>	ka dhimista hantida qaranka. Tartan xor ah iyo furnaan waxay xaqiijiyayaan in shirkadaha ama hay'adaha doonaya qandaraasyadu helaan fursad siman.
	(2) Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyadu waa in ay ilaaliyaan nidaam mideysan oo lagu maamulo iibsiga guud, kaas oo lagu qeexayo xeer federaal oo gaar ah.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay waajibinaysaa in la helo nidaam mideysan oo lagu maamulo iibsiga dadweynaha, kaas oo lagu qeexayo xeer federaal gaar ah.
	(3) Heshiisyada ka-dhimista hantida qaranka, shatiga adeegyada dadweynaha, iyo qandaraasyada waaweyn ee dawladda waa in lagu sameeyaa hab sharciyeed daahfuran, waxaana la marsiinayaa nidaam oggolaansho sharciyeed oo Baarlamaanka Federaalku kormeero.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay sheegaysaa in heshiisyada ka dhimista hantida qaranka, shatiyada adeegyada dadweynaha iyo qandaraasyada waaweyn loo maro hannaan sharciyeed oo daahfuran, isla markaana ay hoos yimaadaan oggolaansho iyo kormeer Baarlamaanka Federaalka.
<b>Qodobka 123aad: Bangiga dhexe ee Federaalka</b>	<b>Qodobka 171aad: Bankiga Dhexe ee Federaalka</b>	Cinwaanka Qodobka 171aad ee soojedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 123aad waxba lagama beddelin.
1) Sharci baarlammaanka Federaalku ansixiyay ayaa lagu dhisiyaa Bangiga dhexe ee Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.		Faqraddan waxaa loo raray faqradda 5aad ee isla qodobkan.

	(1) Bankiga Dhexe ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hay'ad dawladeed oo madaxbannaan lehna shakhsiyad qaanuuneed, una hoggaansamaysa keliya Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in Bangiga Dhexe yahay hay'ad dawladeed oo madaxbannaan, una hoggaansamaysa Dastuurka iyo xeerarka dalka.
2) Bangiga dhexe ee Federaalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa masuul ka ah dejinta iyohirgelinta siyaasadda maaliyadda iyo lacagta, bangiyada oo dhammina waxay u hoggaansamaan xernidaamiyayaashuu dhejiyo Bangiga Dhexe ee Federaalka.	(2) Bankiga Dhexe ee Federaalka wuxuu mas'uul ka yahay siyaasadda lacagta, nidaaminta iyo korjoogtaynta hay'adaha maaliyadda, daabacadda lacagta, maaraynta kaydka qaranka, adeegga banki ee hawlaha dawladda iyo fulinta hawlaha kale ee uu u xilsaaro xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka.	Faqraddan waxaa lagu sameeyey siiqeyn iyo ballaarin , waxayna xeerinaysaa masuuliyadaha Bangiga Dhexe .
3) Xilaalka ugu mudan hawlaha Bangiga Dhexe ee Federaalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyawaxa weeye: a) Soo saaridda lacagta. b) Hubinta negaanshaha ascaarta. c) Negaanshaha heerka sarrifka; iyo d) Nidaam bangi oo maangal ah.		<b>Faqraddan waa la tiray:</b> Faqraddan nuxurkeeda waxaa lagu daray Qodobka ka ka hadlaya awoodaha Bankiga Dhexe.
4) Siyaasadda maaliyaddu waa inay ku tiirsanaato dhaq-dhaqaaqa suuqa ee aan go'aanno maamulsaldhig looga dhigin amah-bixinta.	(3) Siyaasadda lacagta ee Bankiga Dhexe ee Federaalka waa in lagu saleeyaa danta guud ee dhaqaalaha qaranka, iyadoo lagu hagayo mabaadi'da xasiloonida dhaqaale, ilaalinta qiimaha lacagta, iyo horumarinta koboca dhaqaale.	Faqraddan waxaa lagu sameeyey siiqo toosin waxay xeerinaysaa in siyaasadda lacagta ee Bangiga Dhexe lagu saleeyo danta guud iyo dhaqaalaha qaranka.
5) Bangiga Dhexe ee Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu leeyahay awood madaxbannaan oo dhammaystiran oo uu ku guto siyaasadda lacagta.		<b>Faqraddan waa la tiray:</b> nuxurkeeda waxaa loo raray faqradaha laad iyo 2aad ee qodobkan.

6) Bangiga Dhexe ee Federaalka waa Bangiga Keydka Qaranka.		<b>Faqraddan waa la tiray:</b> nuxurkeedana waxaa loo raray faqradda 2aad ee isla qodobkan.
	(4) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka ayaa qeexi doonaa qaabdhismeedka, awoodaha, hawlaha, iyo habraacyada shaqo ee Bankiga Dhexe ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	Faqraddan waxaa lagu soo raray faqradda 1aad ee isla qodobkan.
	<b>Qodobka 172aad: Maamulka Bankiga Dhexe</b>	<b>Qodob cusub</b>
	(1) Waxaa jiraya Guddiga Maamulka Bankiga Dhexe oo ka kooban: (a) Guddoomiyaha Bankiga Dhexe oo ah guddoomiyaha guddiga; (b) Guddoomiye Kuxigeenka Bankiga Dhexe oo noqonaya Guddoomiye Kuxigeenka Guddiga; (c) Shan (5) xubnood oo madaxbannaan oo khibrad ku ah dhaqaalaha, maaliyadda, sharciyada ama maamulka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in Bankiga Dhexe yeelanayo Guddi Maamul oo ka kooban Guddoomiyaha, Guddoomiye Kuxigeenka iyo shan xubnood
	(2) Guddoomiyaha Bankiga Dhexe waxaa magacaabistiisa soojeedinaya Golaha Wasiirrada, waxaa aqlabiyad boqolkiiba konton iyo hal dheeri (50%)+1 ku ansixinaya Gole kasta ee Baarlamaanka Federaalka, kaddib Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa ku meelmarinaya Xeer Madaxweyne.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa habraaca magacaabista Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Bankiga Dhexe.
	(3) Guddoomiye Kuxigeenka Bankiga Dhexe iyo Shanta (5) xubnood ee ka mid noqonaya Guddiga Maamulka Bankiga Dhexe waxaa soojeedinaya Golaha Wasiirrada, waxaana xeer Madaxweyne ku meelmarinaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa habraaca magacaabista shanta (5) xubnood ee ka mid noqonaya guddiga maamulka Bankiga dhexe.
	(4) Qofka loo magacaabay xilka Guddoomiyaha Bangiga Dhexe waa inuu leeyahay khibrad iyo aqoon qoto dheer oo dhanka maaliyadda, dhaqaalaha ama sharciga, iyo sumcad daacadnimo,	Faqraddan waxay xeerinaysaa shuruudaha lagu musharraxa waxay xoogga saarayaan aqoon, khibrad iyo sumcad daacadnimo, iyo in aanu

	isla markaana aanu ku lug lahayn dano ganacsi ama siyaasadeed oo is-khilaafsan.	jirin dano ganacsi ama siyaasadeed oo is khilaafsan.
	(5) Muddada xilhaynta xubnaha maamulka Bankiga dhexe waxa ay noqonaysaa shan (5) sano, oo hal mar la cusboonaysiin karo.	Faqraddan waxay tilmaamaysaa muddo xileedka guddoomiyaha oo ah shan sano oo hal mar la cusboonaysiin karo.
	(6) Guddoomiyaha waxaa xilka laga qaadi karaa oo keliya haddii uu: <ul style="list-style-type: none"> <li>a) Ku xadgudbo Dastuurka ama xeerarka dalka;</li> <li>b) Lagu caddeeyo fal musuq maasuq;</li> <li>c) Ku sifoobo waxqabad xumo daran iyo ku guuldarreysiga fulinta siyaasadda lacagta; iyo</li> <li>d) Uu lumiyo awoodda uu ku fulin karo waajibaadkiisa caafimaad ahaan.</li> </ul>	Faqraddani waxay tilmaamaysaa xaaladaha xil ka qaadista oo ay kamid yihiin sida ku xadgudub sharci, musuqmaasuq, waxqabad xumo daran, ama awood darro caafimaad. Habraaca xil ka qaadistu wuxuu marayaa Golaha Wasiirrada iyo Madaxweynaha, wuxuuna u baahan yahay ansixinta aqlabiyadda labada aqal ee Baarlamaanka.
	(7) Habraaca xilkaqaadista maamulka bankiga waxaa loo marayaa isla habraacii lagu magacaabay.	Faqraddan waxay xeerinaysaa habraaca xilkaqaadista maamulka bankiga dhexe.
<b>Qodobka 124aad: Sharci-dejinta Federaalka ee Arrimaha Maaliyadda</b>		<b>Qodobkan waa la tiray.</b> Nuxurkiisa waxaa lagu daray Qodobbada kale ee cutubkan.
Sharci Baarlammaanka Federaalku ansixiyo ayaa qeexaya heykal maamul-maaliyadeed oo astaamihiisu ay ka mid yihiin: <ul style="list-style-type: none"> <li>a. Habka loo soo bandhigo miisaaniyadda Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkada iyo Jadwalka habraaca miisaaniyad-samaynta Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayada iyo</li> </ul>		

<p>degmooyinka kaasoo ay tahay inuu ahaado mid daahfuran, la xissabtan leh, wax-ku-oolna ah.</p> <p>b. In Dawladda Federaalku uu damaanad-qaad siiso deymaha ay weydiistaan Dawlada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayada;</p> <p>c. Habraaca Dawladdu u marayso Qandaraasyada Guud;</p> <p>d. Baarista xisaabaadka hay'adaha aan xukuumiga ahayn ee Dawladda dhaqaale ka hela;</p> <p>e. Tallabooyinka guud ee lagama maarmaanka u ah dhaqangelinta cutubkan</p>		
<p><b>Qodobka 125aad: Kaydka Qaranka</b></p>		<p><b>Qodobkan waa la tiray.</b> Nuxurkiisa waxaa lagu daray Qodobbada kale ee cutubkan.</p>
<p>1) Sharci uu ansixyo Baarlamaanka Federaalku waa in lagu dhiso hay'ad Qaran oo u adeegta kayd Qaran ahaan. Isla sharcigaasuna dejiyo hannaan sugan oo lagu hubin karo xalaalnimada dakhli xeraynta iyo kharash bixinta heer kasta ee hay'adaha Jamhuuriyadda Federaalka. Isla sharcigaasuwa inuu ku salaysnaado nidaam xisaabtan adduun ahaan la tijaabiyay lana aqoonsanyahay oo leh halbeegyo la xariira kaydinta iyo khrajbixinta maaliyadda oo si iskumid uga</p>		

dhaqangala meel walbaoo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka mid ah.		
2) Hay'adda Kaydka Qaranku waa inuu hubiso uhoggaansanaanta mabda'a ku xusan Farqadda (1), waa inay ka joojiso xawilladaha lacageed qayb kasta oo Dawladda ka mid ah oo xadgubyo culus geysataama si isdabajoog ah u garab marta sharciga Kaydka Qaranka.		
	<b>Qodobka 173aad: Xafiiska Xisaabiyaha Guud</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	(1) Waxaa jiraya Xafiiska Xisaabiyaha Guud, oo ah hay'ad fulineed oo mas'uul ka ah maamulka iyo diiwaangelinta xisaabaadka Dawladda Federaalka, oo ka mid ah wasaaradda Maaliyadda.	<b>Faqrad cusub:</b> Farqaddan waxay xeerinaysaa jiritaanka sharciyeed ee xafiiska iyo kaalintiisa ku aaddan maamulka iyo diiwaangelinta xisaabaadka dawladda.
	(2) Xafiisku wuxuu u xilsaaranyaha fulinta lacag-bixinta, kaydinta iyo diiwaangelinta dakhliga iyo kharashaadka, iyo hirgelinta nidaamka xisaabaadka mideysan ee dawladda.	Faqrad cusub: Farqaddan waxay qeexaysaa awoodaha hawlgal ee xafiiska, oo ay ka mid yihiin maamulidda khasnadda qaranka, fulinta lacag-bixinta, kaydinta iyo diiwaangelinta dakhliga iyo kharashaadka, iyo hirgelinta nidaam xisaabeed mideysan.
	(3) Xafiisku wuxuu diyaarinayaa xisaab-xirka sannadlaha ah ee Dawladda Federaalka, kaas oo loo gudbinayo Hantidhowraha Guud si loo baaro, kaddibna Baarlamaanka Federaalka loo horgeeyo.	<b>Faqrad cusub:</b> Farqaddan waxay nidaaminaysaa isla-xisaabtanka, iyadoo ku waajibinaysa Xafiiska Xisaabiyaha Guud inuu diyaariyo xisaab-xirka

		sannadlaha ah, kuna gudbiyo Hantidhowraha Guud si loo baaro, kadibna loogu gudbiyo Baarlamaanka Federaalka.
	(4) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka ayaa faahfaahinaya qaabdhismeedka, awoodaha, waajibaadka, iyo habraacyada shaqo ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in BFS soo saarayo xeer faahfaahinaya xafiiska xisaabiyaha guud.
	<b>Qodobka 175aad: Hantidhowrka Guud Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	(1) Hantidhowrka Guud waa hay'ad madaxbannaan oo leh shakhsiyad qaanuuneed, una hoggaansameysa keliya Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	<b>Faqrad cusub:</b> Farqaddan waxay Hanti-dhowrka Guud u aqoonsanaysaa hay'ad madaxbannaan oo leh shakhsiyad qaanuuneed, kuna shaqaynaysa Dastuurka iyo xeerarka dalka.
	(2) Xafiiska Hantidhowrka Guud waa hay'adda ugu sarreysa hantidhowrka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	<b>Faqrad cusub:</b> Farqaddan waxay qeexaysaa in Xafiiska Hanti-dhowrka Guud yahay hay'adda ugu sarreysa ee kormeerka maaliyadeed heer qaran.
	(3) Hantidhowrka Guud wuxuu baaraa, kana warbixiyaa hantida qaranka, xisaabaadka, qoraalada iyo maareeynta maaliyadda ee la xiriira: (a) Hay'adaha Dawladda Federaalka; (b) Hay'adaha Dawlad Goboleedka; (c) Hay'adaha Dawladaha Hoose; iyo (d) Hay'ad kasta oo kale ee hesha maaliyad guud ee federaal.	<b>Faqrad cusub:</b> Farqaddan waxay ballaarinaysaa baaxadda kormeerka, iyadoo ku darsanaysa hay'adaha federaalka, dawlad goboleedyada, dawladaha hoose iyo hay'ad kasta oo hesha maaliyad guud.
	(4) Warbixinnada Hantidhowrka ee u abbaaran Dawladda Federaalka waxaa loo gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka,	<b>Faqrad cusub:</b>

	halka Golaha Wakiillada ee Dawlad Goboleedka loo gudbinayo warbixinnada khuseeya.	Farqaddan waxay waajibinaysaa in warbixinnada loo gudbiyo Baarlamaanka Federaalka ama Golaha Wakiillada ee heer gobol marka ay khuseyso.
	(5) Hantidhowraha Guud waxaa lagu magacaabayaa habraaca soo socda: a) Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa soojeedinaya musharraxa jagada Hantidhowraha Guud; waxayna u gudbinayaan Baarlamaanka Federaalka; b) Gole kasta ee Baarlamaanka Federaalka ayaa codka aqlabiyadda haldheeri (50%)+1 ku ansixinaya ama ku diidaya musharraxa la soojeediyay.	<b>Faqrad cusub:</b> Farqadahan waxay dejinayaan habraaca magacaabista Hantidhowraha Guud, oo ku dhisan soo jeedin Golaha Wasiirrada, ansixin labada Gole ee Baarlamaanka cod aqlabiyad leh.
	(6) Marka Labada Gole ee Baarlamaanku ansixiyaan musharraxa, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ayaa si rasmi ah xeer Madaxweyne ugu meelmarinaya magacaabista.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in marka labada gole ansixiyaan musharraxa xilka Hantidhowraha Guud uu Madaxweynaha Jamhuuriyaddu xeer madaxweyne ku magacaabayo.
	(7) Hantidhowraha Guud ayaa xilka haynaya hal xilli oo shan (5) sano ah oo hal mar la cusbooneysiin karo.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa muddada xilhaynta ee Hantidhowraha Guud .
	(8) Hantidhowraha Guud ee Qaranka waxaa xilka looga qaadi karaa habraac la mid ah kan lagu soo magacaabay.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa habraaca xilka looga qaadayo Hantidhowraha Guud ee Qarabka.
	(9) Hantidhowraha Guud ee Qaranku waa in uu noqdaa qof leh sumcad wanaagsan, haysta shahaado Jaamaceed ee heerka	<b>Faqrad cusub:</b>

	labaad oo la xiriirta maaliyadda, xisaabaadka ama sharciga una leh khibrad ugu yaraan 10 sano howlaha hanti-dhowrka, buuxiyana shuruudaha kale ee ku xusan xeerarka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	Faqraddan waxay tillmaamaysaa shuruudaha looga baahan yahay qofka loo magacaabay xilka Hnatidhowraka Guud ee Qaranka.
	(10) Xafiiska Hantidhawrka Guud waxa uu xaq u leeyahay in uu si toos ah ula shaqeeyo Hantidhawrada madaxbannaan oo Dawlad Goboleedyada si loo xaqiijiyo isku xirnaanta nidaamka kormeerka maaliyadeed ee federaalka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay siinaysaa Xafiiska Hanti-dhawrka Guud awood uu si toos ah ula shaqeeyo Hantidhawrayaasha madaxbannaan ee Dawlad Goboleedyada. Ujeeddadu waa in la helo nidaam kormeer maaliyadeed oo isku xiran oo heer federaal ah, si warbixinada iyo habraacyadu u noqdaan kuwo is waafaqsan.
	(11) Warbixinnada Hantidhawrka Guud waa in loo diyaariyaa si daahfuran oo la heli karo, waxaana si buuxda loogu soo bandhigayaa Baarlamaanka, Golaha Wakiillada ee Dawlad Goboleedyada iyo shacabka Soomaaliyeed.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay waajibinaysaa in warbixinada loo diyaariyo si daahfuran oo la heli karo, laguna soo bandhigo Baarlamaanka, Golayaasha Wakiillada ee Dawlad Goboleedyada iyo shacabka.
	(12) Warbixinta Hantidhowraka waa in Baarlamaanka Federaalku ku ansixiyaa ama ku diidaa muddo saddex (3) bilood gudahood.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay ku xiraysaa Baarlamaanka waajib ah in uu ka doodo warbixinta muddo saddex bilood gudahood ah marka la soo gudbiyo. Tani waxay ka hortagaysaa in warbixinadu noqdaan kuwo aan laga falcelin, waxayna

		dardargelinaysaa kormeerka xeerdejinta.
	(13) Dawlad Goboleed kasta waa inuu yeesho Hantidhowre Guud, ayadoo heer federaal lagu mideynayo habraacyada iyo heerarka kormeerka.	<b>Faqrad cusub:</b> Farqaddan waxay dhigaysaa in Dawlad Goboleed kasta yeesho Hanti-dhowre Guud, iyadoo heer federaal lagu mideynayo habraacyada iyo heerarka kormeerka. Qaabkan wuxuu dhisayaa nidaam federaal oo isku dubbaridan, balse leh fulin heer dawlad goboleed.
	(14) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaminayaa qaabdhismeedka iyo waajibaadkiis xafiiska Hantidhowaraha Guud.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxaa lagu xeeriyey in BFS uu soo saarayo xeer lagu faahfaahinayo.
<b>Qodobka 111C. Guddiga La dagaalanka Musuqmaasuqa</b>	<b>Qodobka 176aad: Guddiga Madaxbannaan ee Ladagaallanka Musuqmaasuqa</b>	Cinwaanka Qodobka oo Asalka dastuurka ahaa 111C waxba lagama beddelin.
1) Waa inuu jiraa Guddi la Dagaalanta Musuqmaasuqaq waana in awoodoodu noqotaa inay baaraan eedaha ku saabsan musuqmaasuqa lagu soo oogo qaybaha Dawladda	(1) Waxaa la dhisayaa Guddi Madaxbannaan oo u xilsaaran Ladagaallanka Musuqmaasuqa, kaas oo leh awood baaritaan oo ku saabsan eedaha musuqmaasuq iyo falalka la xiriira musuqmaasuqa ee ka dhaca hay'adaha dawladda iyo hay'ad kasta oo maamusha ama ka faa'iidayata hanti dadweyne.	Faqraddan waxaa lagu sameeyey dib-u-siiqeyn iyo ballaarin, ayada oo lagu kordhiyey in aan awoodda guddigu ku koobnayn eedaha loo soo gudbiyoi keli ah , laakiin uu baari karo falalka la xiriira musuqmaasuqa. Waxa kale oo lagu kordhiyey "hay'ad kasta oo maamusha ama ka faa'iidayata hanti dadweyne."

<p>2) Guddiga La-dagaallanka Musuqmaasuqa waxay sameyn karaan baaris marka ay rabaan, kuma eka keli ah hawshoodu marka cabasho loo soo gudbiyo.</p>	<p>(2) Guddigu waxa uu sameyn karaa baaritaan isaga oo iskiis u billaabaya ama ku salaynaya cabasho, xog sirtoon, warbixin hanti dhowr, ama xog kale oo lagu kalsoonaan karo. Shaqadiisu kuma koobna cabasho la soo gudbiyo.</p>	<p>Faqraddan waxaa lagu sameeyaysiiqo toosin iyo dib-u-habayn, waxaana lagu soo kordhiyay “xog sirtoon, warbixin hantidhowr, ama xog kale oolagu kalsoonaan akro.”</p>
<p>3) Mas’uuliyadaha Guddiga La Dagaalanka Musuqmaasuqa waxa ka mid ah:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>Horumarinta iyo adkeynta tallaabooyinka lagu joojinayo lagulana dagaalamayo musuqmaasuqa ee ugu fiican uguna habboon;</li> <li>Horumarinta, fududeynta iyo taageeradda Iskaashiga Caalamiga iyo taageeradda farsamadda;</li> <li>Horumarinta daacadnimadda, xisaabtanka, iyo habsami u maamulka arrimaha dadweynaha iyo hantida dadweynaha.</li> </ol>	<p>(3) Mas’uuliyadaha Guddiga waxaa ka mid ah:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>Horumarinta siyaasadaha iyo tallaabooyinka ka hortagga musuqmaasuqa, oo ay ku jiraan habraacyo daahfurnaan iyo islaxisaabtan;</li> <li>Kor u qaadista daacadnimada iyo maamulka hufan ee hantida dadweynaha, gaar ahaan hababka wax iibsiga, heshiisyada, canshuuraha, kharashaadka, iyo maareynta dakhliga;</li> <li>Wacyigelinta dadweynaha, diyaarinta cilmi baaris iyo tababbar ku saabsan ka hortagga musuqmaasuqa;</li> <li>Kor u qaadista iskaashiga hay’adaha federaalka, Dawlad Goboleedyada, iyo iskaashiga caalamiga ah ee dhinacyada farsamada iyo xog is weydaarsiga;</li> </ol>	<p>Faqraddan waxaa lagu sameeyaysiiqo toosin iyo ballaarin.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>- Xarafka (a) waxaa lagu kordhiyey “oo ay ku jiraan “habraacyo daahfurnaan iyo islaxisaabtan”.</li> <li>- Xarafka (b) nuxurkiisa Asalka Dastuurka waxaa loo raray Xarafka (d) ee qodobkan oo xeerinaya iskaashiga gudaha iyo dibadda. Xarafka hadda waxa uu tilmaamayaakor uqaadista hufnaanta maamulka hantida dadweynaha.</li> <li>- Nuxurka Xarafka (c) waa mid cusub oo tilmaamaya masuuliyadaha guddiga oo ay kamid yihiin wacyigelinta, cilmi baarista iyo tababbarro.</li> <li>- Xarafka (d) ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa Xarafka (b) ee Asalka Dastuurka oo dib u siiqeyn lagu sameeyey.</li> </ul>

<p>4) Awoodaha Guddiga La Dagaalanka Musqmaasuqa waxa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>a) Ka hortaga, baarista, faafinta dacwooyinka musuqmaasuqa;</li> <li>b) Xayiraadda, qabashada, la wareegga/qaadashada iyo celinta faa'iidada fal danbiyeedka;</li> <li>c) Taageerista dejinta sharciyadda iyo tallaabooyinka ku habboon ee lagu joojinayo, xakameynayo laguna qaadayo falal dembiyeedka la xiriira musuqmaasuqa.</li> </ul>	<p>(4) Awoodaha Guddiga waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>a) Ka hortagga, baarista, ururinta caddeymaha, iyo u gudbinta dacwadaha musuqmaasuqa xafiiska xeer-ilaalinta;</li> <li>b) Dalbashada helista dukumentiyoy, xog, diiwaanno, iyo macluumaad ay hayaan hay'adaha dawladda iyo cid kasta oo adeeg dadweyne haysa, iyadoo la ilaalinayo xeerarka sirta iyo xogta;</li> <li>c) Soo saarista tilmaamo iyo halbeegyo anshax iyo ka hortag iskahorimaadka danaha oo loogu talagalay hay'adaha dawladda, si waafaqsan xeerka;</li> <li>d) Soojeedinta talooyin lagu xakameynayo musuqmaasuqa.</li> </ul>	<p>Faqraddan waxaa lagu sameeyey siiqo toosin iyo dib u qoris. Xarafka (a) waxaa lagu kordiyey "baarista, ururinta caddeymaha, iyo gudbinta kiisaska musuqmaasuqa hay'adaha awoodda u leh dacwad oogista." Xarafka (b) waa mid cusub oo la soo kordhiyey oo xeerinaya awoodda dalbashada xogaha iyo macluumaadka ay hayaan hay'adaha bixiya adeegga dadweynaha. Xarafka (c) waa mid cusub oo tilmaamaysa soo saarista halbeegyo anshax iyo ka hortagga danaha iska horimaanaya. Xarafka (e) oo Asalka Dastuurka ahaa Xarafka (c) waxaa lagu sameeyey siiqo toosin waxayna tilmaamaysaa bixinta talo sharci iyo soojeedinta hindise xeereed la xiriira la dagaallanka musuqmaasuqa.</p>
<p>5) Halka ay gaarsiisan tahay awoodda Guddiga La-dagaallanka Musuqmaasuqa waxa ka mid ah arrimaha la xiriira:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>a) Musuqmaasuqa qaranka ama dibeddea ee saraakiisha Dawladda;</li> <li>b) Boobka, isdhicitaanka iyo leexsashada saraakiisha Dawladda ee hantida Dawladda iyo hantida gaarka ah;</li> </ul>	<p>(5) Xayndaabka awoodda Guddiga waa arrimaha soosocda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>a) Musuqmaasuqa ay ku kacaan saraakiisha dawladda, gudaha iyo dibedda dalka;</li> <li>b) Lunsasho, boob, leexsasho, ama ku takri fal hanti dadweyne ama hanti gaar ah oo lagu aaminay masuul dawladeed;</li> <li>c) Ku shaqaysiga nufuudda iyo xiriirrada gaar ah si loo helo faa'iido aan sharci ahayn;</li> </ul>	<p>Faqraddan waxaa lagu sameeyey siiqo toosin waxayna xeerinayaa falalka ay daboolayso awoodda Guddiga.</p>

<p>c) Ku-shaqaysashada nufuudda ama xiriirada gaarka ah;</p> <p>d) Si xun ugu dhaqanka hawlaha shaqada iyo taajiridda aan sharciga ku dhisnayn.</p>	<p>d) Ku xadgudub waajibaad shaqo, iskahorimaad dano, ama ka taajirid xil dawladeed si sharci darro ah.</p>	
<p>6) Guddiga La Dagaalanka Musuqmaasuqa waa inuu madax banaanaadaa, dhedhexaad ahaadaa , eexla'aan ahadaa, waa in lagu wada jiraa, loona dhan yahay, waana in aanu ka badan sagaal (9) xubnood.</p>		<p><b>Faqraddan waa la tiray</b> Nuxurkeeda waxaa lagu daray Qodobka 176aad ee cutubkan.</p>
	<p>(6) Xubnaha Guddigu wuxuu ka koobanyahay sagaal (9) xubnood, waxayna iska dhexdooranayaan Guddoomiye iyo Guddoomiye ku xigeen.</p>	<p><b>Faqradd cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaaysaa tirade xubnaha Guddiga.</p>
	<p>(7) Shuruudaha xubinnimada, magacaabidda, muddada xilhaynta iyo xilkaaqaadista xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Musuqmaasuqa waxaa loo marayaa habraaca la mid ah midka Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ee ku xusan qodobbada 55aad ilaa 60aad ee Dastuurka.</p>	<p><b>Faqradd cusub:</b> Qodobkan waxay xeerinaysaa in s Shuruudaha xubinnimada, magacaabidda, muddada xilhaynta iyo xilkaaqaadista xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Musuqmaasuqa uu la midyahay kan Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimaha ee ku xusan qodobbada 55aad ilaa 60aad ee Dastuurka.</p>

**CUTUBKA LABA IYO TOBNAAD:  
DIFAACA IYO AMNIGA QARANKA**

Asalka Dastuurka KMG	Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD uuna ansixiyay Guddiga Lasocodka	Faallo:
CUTUBKA 14AAD: NABADDA IYO AMNIGA	CUTUBKA 12AAD: DIFAACA IYO AMNIGA QARANKA	Cinwaanka Cutubka oo markii hore ahaa “Nabadda iyo Amniga” waxaa laga dhigay “Difaaca iyo Amniga Qaranka”.
	<b>Qodobka 177aad: Mabaadii’da Amniga Qaranka</b>	<b>Qodob cusub:</b>
	(1) Amniga Qaranku waa ka hortagga iyo maareynta khataraha gudaha iyo dibedda ee ku wajahan gobonnimada, madaxbannaanida, midnimada dhuleed, iyo difaaca Qaranka, xasilloonida siyaasadeed iyo bulsho, nabadgelyada guud, caafimaadka guud, xasilloonida dhaqaale, badqabka deegaanka, kheyraadka muhiimka ah, muwaadiniinta iyo xuquqdooda dastuuriga ah.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in amniga qaranku yahay ka hortagga iyo maareynta khataraha gudaha iyo dibedda.
	(2) Sugidda Amniga Qaranka waxaa loo maareynayaa si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka u yaalla.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminaysaa in sugidda amniga loo maareynayo si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kala ee dalka.
	(3) Hay’adaha Amniga ee Qaranka waxaa kormeeraya oo la xisaabtamaya Hay’adaha Rayidka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in hay’adaha amnigu ay korjoogteenayaa hay’adaha rayidkan oo ay ka mid yihiin Wasaaradaha ay khuseyso, Golaha Amniga Qaranka, Guddiyada ay khuseyso ee Goleyaasha Baarlamaanka

		Federaalka, iyo ciddii kale Dastuurku iyo shuruucda kale u xilsaaraan).
	(4) Marka la xaqiijinayo dano khuseeya Amniga Qaranka, waxaa la dhowrayaa mabaadi'da dastuuriga ah ee dimuqoraaddiyadda, nidaamka federaalka, talinta sharciga, xuquuqda aadanaha oo ay ka mid yihiin xuquuqda dastuuriga ah, iyo badqabka dadka rayidka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa marka la xaqiijinayo dano khuseeya Amniga Qaranka, waxaa la dhowrayaa mabaadi'da dastuuriga ah ee dimuqoraaddiyadda, nidaamka federaalka, talinta sharciga, xuquuqda aadanaha
	(5) Waxaa la hiigsanayaa dhowrista danaha Qaranka ee ku saleysan:  (a) Ilaalinta nidaamka dastuuriga ah ee kala soocnaanta awoodaha laamaha Dowladda iyo isla xisaabtanka; (b) Gobonnimada iyo midnimada dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil oo ay ku jiraan berriga, badaha, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda sare, geyi-qaaradeedkooda, dhul iyo biyo-goboleed kasta oo ku soo biira Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka; (c) Badbaadada iyo baraaraha muwaadiniinta Soomaaliyeed; (d) Ka qeybqaadashada xasilloonida iyo amniga gobolka iyo caalamka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminaysaa in amniga qaranku hiigsanayo dhowrista danaha qaranka.

Qodobka 126aad: Suggidda Amniga Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya	Qodobka 178aad: Hay'ada Amniga iyo Difaaca	Cinwaanka Qodobka oo markii hore ahaa "Suggidda Amniga Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya" waxaa laga dhigay "Hay'ada Amniga iyo Difaaca".
<p>(1) Xukuumadda Federaalku waxay damaanad-qaadaysaa nabadda, gobannimada iyo ammaanka qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo bedbaadinta shacbiga, iyadoo la adeegsanaayo adeegyada ciidammada amniga oo ay ku jiraan:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>Ciidanka xoogga dalka;</li> <li>Nabadsugidda;</li> <li>Ciidanka booliska;</li> <li>Ciidamada Asluubta</li> </ol>	<p>(1) Hay'adaha Amniga ee Qaranka waa kuwa soo socda:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>Ciidanka Xoogga Dalka;</li> <li>Booliska;</li> <li>Asluubta; iyo</li> <li>Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.</li> </ol>	<p>Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah, waxaana lagu sameeyay kala hor marin iyo qaabayn iyadoon nuxurka waxba laga bedelin.</p>
<p>(2) Adeegsiga ciidamada amniga waxaa lagu sugaya sharciga loo dejiyey.</p>	<p>(2) Hay'ad amni aan aheyn afar hay'adood ee ku cad faqradda kowaad waxaa lagu dhisi karaa xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo keliya.</p>	<p>Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, balse waxaa lagu samaayay siiqotoosin.</p>
<p>(3) Ciidammada qalabka sida ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa xil ka saaran yahay ilaalinta gobannimada iyo madaxbannaanida Dalka iyo difaaca midnimada dhuleed.</p>		<p><b>Faqraddan waa la tiray,</b> waxaana loo raray nuxurka qodobbada cutubkan.</p>
<p>(4) Booliska Federaalka xilkiisu waa ilaalinta nolosha iyo hantida, ammaanka iyo nabadgelyada Muwaaddiniinta iyo dadka kale ee deggan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.</p>		<p><b>Faqraddan waa la tiray.</b> waxaana loo raray nuxurka qodobbada cutubkan.</p>

<p>(5) Ciidanka booliska ee lagu abuuray sharciyada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayadaxilkiisu waa ilaalinta nolosha iyo hantida muwaaddiniinta iyo dhawrista xasilloonida iyo ammaanka degaannadooda iyadoo kaligood ah ama kaashanaya ciidammada booliska federaalka.</p>		<p><b>Faqraddan waa la tiray.</b></p>
<p>(6) Hay'adaha amniga qaranka oo ah kuwa hubka sita waxaa kormeeraya oo koontaroolaya hay'adaha rayid ah.</p>		<p><b>Faqraddan waa la tiray.</b> Faqraddan nuxurkeeda waxaa loo raray isla qodobkan faqradihiisa</p>
<p><b>Qodobka 179aad: Golaha Amniga Qaranka</b></p>		<p><b>Qodob cusub</b></p>
	<p>(1) Waxaa jiraya Golaha Amniga Qaranka oo u xilsaaran:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>(a) Kormeeridda hay'adaha Amniga Qaranka;</li> <li>(b) Jihaynta qorsheyaasha iyo howlaha amniga Qaranka.</li> <li>(c) Ku gacansiinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda gudashada xilalkiisa ku aaddan amniga Qaranka;</li> <li>(d) Falanqaynta xaaladaha amniga gudaha iyo dibadda Dalka;</li> <li>(e) Diyaariyaan istaraatiijiyadda dhisidda, qalabaynta, tababaridda iyo horumarina ciidamada qalabka sida ee dalka; iyo</li> <li>(f) Fulinta istaraatiijiyadaha iyo qorshooyinka diffaaca iyo amniga qaranka ee u degsan dowladda;</li> </ul>	<p><b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminaysaa dhismaha Golaha Amniga Qaranka.</p>
	<p>(2) Golaha Amniga Qaranka wuxuu ka koobanyahay:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>(a) Madaxweynaha Jamhuuriyadda oo ah Taliyaha Guud ee Ciidammada Qalabka Sida ahna Guddoomiyaha Golaha Amniga Qaranka;</li> <li>(b) Ra'iisulwasaaraha X.F.S.;</li> <li>(c) Wasiirka Gaashaandhigga;</li> <li>(d) Wasiirka Arrimaha Dibedda;</li> <li>(e) Wasiirka Arrimaha Gudaha;</li> </ul>	<p><b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminaysaa xubnaha ay ka koobanyihiin Golaha Amniga Qaranka.</p>

	(f) Wasiirka Amniga Gudaha; (g) Wasiirka Gaadiidka iyo Duulista Hawada; (h) Wasiirka Caddaaladda; iyo (i) Wasiirka Maaliyadda.	
	(3) Goluhu wuxuu yeelanayaa xubno farsamo ee kala ah: (a) Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka; (b) Taliyaha Boliiska Federaalka; (c) Taliyaha Asluubta; (d) Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka; (a) Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka; iyo (b) Lataliyaha Amniga Qaranka oo noqonaya Xoghaynta Golaha Amniga Qaranka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa farsamo xubnaha ay ka koobanyihiin Golaha Amniga Qaranka.
	(4) Waxaa jiraya guddiyo amni oo heer Dawlad Goboleed ah kuwaas oo kaabaya shaqada Golaha Amniga Qaranka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminaysaa in uu jiro guddiyo amnio oo heer Dawlad Goboleed ah.
	<b>Qodob 180aad: Ciidanka Xoogga Dalka</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	(1) Ciidanka Xoogga Dalka oo ah Ciidamada Qalabka Sida ee Jamhuuriyadda Federaalka wuxuu ka koobanyahay: (a) Ciidammada Difaaca Dhulka; (b) Ciidammada Difaaca Badda; iyo (c) Ciidammada Difaaca Cirka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waa mid cusub oo xeerinaysa in Ciidanka Difaaca Qaranka oo ah Ciidanka Xoogga uu ka koobanyahay Ciidamada: Difaaca Dalka; Difaaca Badda; iyo Difaaca Cirka.

	<p>(2) Ciidanka Xoogga dalku wuxuu u xilsaaranyahay:</p> <p>(a) Difaacidda dalka;</p> <p>(b) Ilaalinta gobannimada, madaxbannaanida dalka iyo difaaca midnimada dhuleed;</p> <p>(c) Badbaadinta iyo gurmada dadka ee xaaladaha masiibooyinka dabiiciga;</p> <p>(d) Gacansiinta Booliska marka ay jiraan xaalado deg-deg ah ama xaalad dagaal si loo ilaaliyo amniga iyo hantida dadka si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waxaana isticmaalkooda oggolaanaya Golaha Amniga Qaranka oo si joogto ah ugu warbixinaya Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b></p> <p>Faqraddan waa mid cusub oo nidaaminaysa arrimaha uu Ciidanka Xoogga dalka ay u xilsaaranyihiin.</p>
	<p>(3) Dawladda Federaalka oo keliya ayaa awood u leh dhismaha ciidanka xoogga Dalka, hoggaaminta, tababarka iyo maamulkiisaba.</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b></p> <p>Faqraddan waxay xeerinaysaan in Dawladda Federaalka oo keliya ayaa leh ciidanka xoogga Dalka, hogaaminta, tababarka iyo maamulkiisa ayadey u gaar tahay</p>
	<p>(4) Ciidammada Difaaca Qaranka waxaa loo adeegsan karaa gudaha dalka kaliya marka ay jiraan xaalado degdeg ah ama xaaladaha kale ee lagu xusay dastuurka, iyadoo lagu saleynayo go'aan gaar ah oo Baarlamaanku ansixiyo.</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b></p> <p>Faqraddan waxay xeerinaysaa in Ciidamada Difaaca Qaranka loo adeegsan karo gudaha dalka kaliya marka ay jiraan xaalado degdeg ah, iyadoo lagu saleynayo xxeer gaar ah oo Baarlamaanku ansixiyo.</p>
	<b>Qodobka 181aad: Booliiska</b>	<b>Qodob cusub:</b>
	<p>(1) Waxaa halkaan lagu dhisay Boliiska Soomaaliyeed oo ka kooban Boliiska Federaalka; iyo Boliiska Dawlad Goboleedyada.</p>	<p>Faqraddan waxaa laga soo raray Qodobka 126aad faqradiisa 4aad ee asalka Dastuurka, waxayna</p>

		nidaaminaysaa in Boliiska Soomaaliyeed oo ka kooban Boliiska Federaalka; iyo Boliiska Dowlad-goboleedyada.
	(2) Booliska Federaalka oo hoosyimaanaya wasaaradda ay khuseyso ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, wuxuu u xilsaaranyahay ilaalinta nolosha iyo hantida, ammaanka iyo nabadgelyada muwaadiniinta iyo dadka kale ee deggan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminayaa arrimaha uu Ciidanka Booliska Federaalka u xilsaaranyahay.
	(3) Waxaa jiraya Booliiska Dawlad Goboleedka oo lagu abuurayo xeer uu soo saaro Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka, xilkiisunayahay ilaalinta nolosha iyo hantida muwaadiniinta iyo dhowrista xasiloona iyo ammaanka deegaannadooda iyaga oo kaashanaya Ciidanka Boliiska Federaalka.	Faqraddan waxaa laga soo raray Qodobka 126aad faqradisii 5aad ee asalka Dastuurka, wuxuuna nidaaminayaa qaabka ay ku dhismayaa Ciidanka Booliska Dawlad Goboleedka.
	(4) Booliska Federaalku waxay ka hawlgelayaan dhammaan dalka oo dhan.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in Booliska Federaalku waxay ka hawlgelayaan dalka oo dhan; ayagoo iskaashi dhow la samaynaya Booliska Dawlad Goboleedyada.
	(5) Xukuumadda Federaalka ayaa dejinaysa, siyaasadda guud, halbeegyada, qaabdhismeedka, qorista, xilalka, dallacsiinta, dhimista garaaddada, howl-gabnimada iyo habraacyada kale ee dhammaan Booliiska ee heer federaal, waxaana lagu soo saarayaa xeer uu ansixiyo Baarlamanka Federaalka Soomaaliya.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminaysaa in Dawladda Federaalku ay yeelanayso siyaasadda iyo halbeegyada nidaaminaya qaabdhismeedka booliiska dalka oo dhan.

	<b>Qodobka 182aad: Asluubta</b>	<b>Qodob cusub:</b>
	(1) Hay'adda Asluubta Federaalka oo u xilsaaran ilaalinta, maamulidda, sugidda amniga Xabsiyada, fulinta adeegyada dhaqan-celinta iyo daryeelka maxaabiista.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqradan waxay xeerinaysaa awoodda iyo shaqada ciidaanka Asluubta Federaalka.
	(2) Hay'adda Asluubta Dawlad Goboleedka oo u xilsaaran ilaalinta, maamulidda, sugidda amniga, fulinta adeegyada dhaqan-celinta iyo daryeelka maxaabiista maxaabiista ku jirta xabsiyada Dawlad Goboleedka iyo xarumaha asluubta.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqradan waxay xeerinaysaa awoodda iyo shaqada ciidaanka Asluubta Dawlad Goboleedka.
	(3) Xabsiyada Dawladda Federaalka waxaa lagu xirayaa, laguna haynayaan maxaabiista ku xukuman dembiyada federaal si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamayaa in xabsiga federaalka lagu haynayo maxaabiista gelay dembiyada federaalka.
	(4) Xabsiyada Dawlad Goboleedka waxaa lagu xirayaa, laguna haynayaa maxaabiista ku xukuman dembiyada dhaca awoodda xeerka Dawlad goboleedka si waafaqsan Dastuurka, xeerka federaalka iyo xeerka dawlad Goboleedka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamayaa in xabsiga Dawlad Goboleedka lagu haynayo maxaabiista gelay dembiyada ka dhaca Dawlad Goboleedyada.
	(5) Xukuumadda Federaalka ayaa dejinaysaa xeerka, siyaasadda guud, halbeegyada, qaabdhismeedka, qorista, xilalka, dalacsiinta, dhimista garaaddada, howl-gabnimada iyo habraacyada kale ee dhammaan hay'adda asluubta ee heer Federaal iyo heer Dawlad goboleed.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminaysaan in Xukuumadda Federaalka ay dejinayso xeerka, siyaasadda guud, halbeegyada, qaabdhismeedka, qorista, xilalka, dalacsiinta, dhimista garaaddada, howl-gabnimada iyo habraacyada kale ee dhammaan ciidanka

		asluubta ee heer federaal iyo heer Dawlad Goboleed.
	<b>Qodobka 183aad: Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka</b>	<b>Qodob cusub:</b>
	Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka waxa ay mas'uul ka tahay uruurinta iyo gorfeynta xogaha sirdoon iyo xuuraanka ee lagu xaqiijinayo laguna xoojinayo sugidda Amniga Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxayna ka hawlgaleysa gudaha iyo dibadda dalka si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka. Xeer Baarlamaanka Federaalka uu soo saaro ayaa lagu qeexayaa qaabdhismeedka iyo howlaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka.	<b>Faqrad cusub:</b>  Faqraddan waxay xeerinaysaan in Hay'adda Nabad-sugidda Qaranku u xilsaarantahay uruurinta iyo falanqaynta, xogaha sirta ah ee waxtarka u leh amniga qaranka, ciidamada iyo ujeedooyinka siyaasadda dibadda dalka.
<b>Qodobka 127aad: Mabaadii'da Ciidamada Amniga</b>	<b>Qodobka 184aad: Mabaadii'da Ciidamada Difaaca iyo Amniga</b>	Cinwaanka Qodobka waxaa laga dhigay "Mabaa'diida Ciidamada Difaaca iyo Amniga"
(1) Waa in ay Ciidammada Amniga dhawraan mabaadii'da soo socota: a. Mihnadda ciidannimo, anshax-wanaag iyo waddaniyad; b. Dhawrista Talinta Sharciga, hay'adaha dimoqoraaddiga ah iyo xuquuqda asaasiga; c. U-heellanaanta ilaalinta Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; d. Furfurnaan iyo oggolaansho laxisaabtan; e. Dhexdhexaadnimo xag siyaasadeed; iyo f. Xubnaha ciidanka waa in lagu tababara dhaqan gelinta Dasturkan, sharciyada	(1) Waa in Ciidamada Difaaca iyo Amniga ay dhowraan markey gudanayaan waajibaadkooda mabaadii'da soo socota: (a) Ilaalinta iyo ku dhaqanka Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; (b) Dhowrida talinta Sharciga, hay'adaha dimoqoraaddiga ah iyo ilaalinta xuquuqda aasaasiga ee muwaadinka; (c) Mihnadda ciidannimo, anshax-wanaag iyo waddaniyad; (d) Daahfurnaanta iyo oggolaanshaha la-xisaabtanka Hay'adaha Rayidka ee u xilsaaran; (e) Dhexdhexaadnimo iyaga oo aan ku milmeynin arrimaha siyaasadda una hoggaansamaya oo keliya Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka; iyo	Faqradaan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah, waxaa sidoo kale lagu sameeyay toosin iyo kaabid.

dalka iyo heshiisyada caalamiga ee Jamhuriyadda Federaalka Soomaaliya ay qayb ka tahay.	(f) Adkaynta wadaniyadda, Isku-tiirsanaanta, istaakulaynta iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed.	
	(2) Xubnaha ciidanka waa in lagu tababaraa wadaniyad, asluub wanaag, tixgelinta iyo u hoggaansamidda Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.	Faqraddan waxaa laga soo raray faqradda 1(f) ee isla Dastuurka ee isla Qodobkan. Iyadoo lagu kordhiyay ereyada “wadaniyad, tixgelinta iyo u hogaansamidda nidaamka Dastuuriga”.
(2) Muwaadin kasta oo Soomaali waxa uu xaq u leeyahay in uu ka qayb qaato jagooyinka iyo jaranjarooyinka darajo ee Ciidammada iyada oo aan la takooreyn, iyadoo la ilaalinaaya xuquuqda haweenka ee arrintan la xiriirta.	(3) Muwaaddin kasta oo Jamhuuriyadda Federaalka ah wuxuu xaq u leeyahay in uu qabto jago kasta ee ciidamada amniga iyo difaaca dalka, marka uu buuxiyo shuruudaha qorista ciidamada, iyadoo ka mid noqoshadooda loo simanyahay.	Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah iyadoo laga saaray erayga “takoored” laguna bedelay “loo siman yahay”. Hase ahaatee nuxurka waxba lagama bedelin.
	(4) Xubnaha ciidammada nabadgelyada iyo kuwa difaaca waa in lagu magacaabaa laguna dalacsiiyaa qaab ku saleysan aqoon, mudnaan iyo tartan furan.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysaa dejinta mabaadi’da guud oo lagu magacaabay laguna dalacsiinayo Ciidamada Amniga iyo Difaaca Dalka qaybahooda kala duwan.
	(5) Dawladda Federaalka waxa waajib ka saaran in ay hubiso in habraacyada la xiriira shaqaaleynta, tababarka, iyo adeegsiga ciidamada amniga lagu saleeyo matalaad caddaalad ah oo ka dhex muuqdaan dhammaan deegaannada dalka.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in Dawladda Federaalka waxa waajib ka saaran in ay hubiso in habraacyada la xiriira shaqaaleynta, tababarka, iyo adeegsiga ciidamada amniga lagu saleeyo matalaad caddaalad ah oo ka dhex muuqdaan dhammaan deegaannada dalka.

	(6) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa lagu nidaaminayaa dalacsiinta iyo howlgabka hay'adaha amniga iyo ciidammada.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxaa xeerinaysaa in BFS soo saarayo xeer gaar ah oo nidaaminaya dalacsiinta Ciidammada Difaaca iyo Amniga
<b>Qodobka 128aad: Ku-tagrifalidda Awoodeed</b>	<b>Qodobka 185aad: Gaboodfallada Xuquuqda Aadanaha</b>	Cinwaanka Qodobkan waxaa laga dhigay "Ku-xadgudub Awoodeed"
Gaboodfallada xuquuqda Aadanaha ee la tuhunsan yahay in ay xubno ka tirsan Ciidammada Amniga inay dad rayid ah ka galeen waa in dacwadooda lagu qaadaa Maxkamadaha rayidka ah.	(1) Tuhunnada la xiriira gaboodfallada xuquuqda aadanaha ee lagu eedeeyo qof ama xubno ka tirsan hay'ada amniga iyo difaaca inay dad rayid ah ka galeen waa in dacwadooda lagu qaadaa Maxkamadaha rayidka ah.	Faqraddan sideeda ayaa loo qaaday Waxaa la qaatay asalka Dastuurka.
	(2) Dhammaan hay'adaha amniga waa in ay u hoggaansamaan xeerarka adeegsiga xoogga, si waafaqsan: (a) Baahida xaaladda; (b) ilaalinta xuquuqda aasaasiga ah ee dadka; iyo (c) ka fogaanshaha ku tagrifalka awoodeed.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in dhammaan hay'adaha amniga ay u hoggaansamaan xeerarka sharciyeed ee adeegsiga xoogga.
	(3) Muwaaddin kasta oo lagu sameeyo xadgudub, dhaawac, ama waxyeello ka dhalata adeegsiga awoodda sharci-darro ah wuxuu xaq u leeyahay: (a) in uu helo magdhaw iyo garsoor caddaalad ah; (b) in dacwaddiisa la dhegeysto oo loo fuliyo; iyo (c) in la sameeyo baaritaan madaxbannaan haddii ay jirto eedeeyn culus.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in muwaaddin kasta oo ciidamadu u geystaan xadgudub
<b>Qodobka 129aad: Xafiiska Gardoonka</b>		<b>Qodobkan waa la tiray</b>
(1) Dastuurkan wuxuu dhisayaa xafiiska Gardoonka (Ombudsman) waa hay'adaay dadweynuhu u geysan karaan cabashooyinkooda ku saabsan xadgudubyada		

xubno ka tirsan ciidamada and maamulka Dawladda.		
(2) Hay'adda Gardoonku waxay baaritaan iskeed u bilaabi kartaa haddii ay jiraan tuhunno la xariira xadgudubyo ay ciidammadu u geysteen qof and koox ka mid ah bulshada, haddii ay qanacdo inu jiro faldambiyeedna waxa ka oogi karta dacwad maxkamadda ku habboon.		
(3) Sharci gaar ah ayaa xaddidi doona awoodaha iyo waajibaadka Hey'adda Gardoonka		
<b>Qodobka 130aad: Sharciga Hay'adaha Amaanka</b>		<b>Qodobkan waa la tiray</b>
Labada aqal ee Baarlamaanka ayaa soo saaraya xeer maamulaya qaab dhismeedka, shaqada iyo heerarkooda (Stands) hay'daha amaanka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.		
<b>Qodobka 131aad: Xaalad Deg degga ah</b>	<b>Qodobka 186aad: Xaalad Deg-deg ah</b>	Cinwaanka waxba lagama beddelin
1) Xaalad deg deg ah waxaa la soo rogi karaa keliya haddii ay lagama-maarmaan u tahay wax ka qabashada xaalad ba'an oo ka dhalatey dagaal, weerar, fallaaganimo, kala-dambeyn la'aan, masiibo dabiici ah ama arrin kale oo deg deg ah oo ba'an.	(1) Xaalad degdeg ah waxaa lagu dhawaaqi karaa oo keliya marka ay jirto: (a) Gadood ballaaran, fallaaganimo, kala-dambeyn la'aan baahsan iyo rabshado; (b) Masiibo dabiici ah; iyo (c) Ama arrin kale oo deg-deg ah oo ba'an oo khatar gelinaysa ammaanka iyo jiritaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	Faqraddaan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, balse waxaa lagu sameeyay qaabayn.
2) Xaalad deg deg ah waxaa looga dhawaaqi karaa guud ahaan ama qayb ahaan dalka,	(2) Xaalad deg-deg ah waxaa looga dhawaaqi karaa guud ahaan ama qayb ka mid ah dalka, ayadoo la raacayo tallaabooyinka soo socda:	Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, keliya siiqadeeda ayaa la toosiyay, waxaa sidoo kale

<p>laakiin waa in aanu ka badnaa in inta loogu baahan yahay in wax looga qabto xaaladda.</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>(a) In lagu soo rogo xayiraad qaar ka mid ah xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadiniinta;</li> <li>(b) In la baabi'yo ama la laalo awoodaha laamaha ama hay'adaha dawladda;</li> <li>(c) In la siiyo hay'adda fulinta ee Dowladda Federaalka awoodo gaar ah oo lagama maarmaan u ah xakamaynta xaaladdaas.</li> <li>(d) In loo oggolaado Ciidanka Difaaca Qaranka taageeridda tallaabooyinka booliiska ee lagu difaacayo noloshu dadka rayidka ah ama hantida guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo</li> <li>(e) Tallaabo kasta oo kale oo loo arko inay lagama maarmaan u tahay wax ka qabashada xaaladdaas waa in ay waafaqsanaa ujeedooyinka xaaladda deg dega ah.</li> </ul>	<p>lagu kordhiyay dhowr arrimood oo muhiim ah.</p>
	<p>(3) Inta lagu guda jiro xaaladda degdegga ah waxaa reebban:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>(a) Ku xadgudubka xuquuqda Dastuuriga ee lagu sheegay Dastuurka haddii xadgudubkaasi uuna u ahayn lagama maarmaan ujeedooyinka xakamaynta iyo xal-u-helidda xaaladda degdegga ah;</li> <li>(b) Wax-kabedelidda Dastuurka;</li> <li>(c) Laalidda ama xadididda awoodda Madaxweynaha JFS, Golaha Wasiirrada, Baarlamaanka iyo Garsoorka;</li> <li>(d) Kala dirista hay'adaha la doortay ee Dawladda; iyo</li> <li>(e) Qabashada doorashooyin ama wax-kabeddelka xeerka doorashooyinka.</li> </ul>	<p><b>Faqrad cusub:</b></p> <p>Faqraddan waa mid cusub waxayna xeerinaysaa arrimaha reebban inta lagu gudajiro xaaladda degdegga.</p>
	<p>(4) Madaxweynuhu waxaa uu ku dhawaaqi karaa xaalad degdeg ah marka ay u soojeediyaan Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, ama uu codsi uga yimaad Dawlad Goboleedka</p>	<p><b>Faqrad cusub:</b></p> <p>Faqraddan waxay xeerinaysaa in Madaxweynaha JFS oo ku dhawaaqi karo xaalad degdeg ah</p>

		kaddib soojeedinta Golaha Wasiirrada.
3) Madaxweynaha isaga oo tallaabadiisa ku saleynaya codsi uu u soo jeediyey Golaha Wasiirrada waxaa uu ku dhawaaqi kara xaalad deg deg ah oo lagamamaarmaan ah, taas oo markaa ka dib ay kaga doodi karaan, oo ayna ku ansaxin karaan, labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka muddo 21 maalmoodgudahood ah ka dib marka lagu dhawaaqo xaaladda. Doodaha Baarlamaanka Federaalka waxaa ay ahaanayaan kuwo aan qarsoodi ku dhicin oo dadweynaha u furan haddii aaney taasi diideynin xaaladda jirta.	(5) Madaxweynaha markuu ku dhawaaqo xaalad degdeg ah, waa inuu todobo (7) maalmood gudohood u gudbiyaa Baarlamaanka Federaalka Soomaalia si looga dooda, go'aanna looga gaaro cod aqlabiyad ee ku salaysan tirada guud ee Baarlamaanka Federaalka muddo aan ka badneyn 21 maalmood.	Faqradda 3aad ee Dastuurka waxaa loo qaybiyay labo faqraddood oo kala ah Faqradda (3) iyo (4), waxaana loo qoray hab qaanuuni ah, iyadoo muddada 21ka maalmood lagu bedelay 7 maalmood, waxaana loo qeybiyay dhowr faqraddood.
4) Baarlamaanka waa uu oggolaan karaa ama waxaa uu u kordhin karaa waqtiga isaga oo gaarsiinaya muddo aan ka badneyn saddex bilood. Haddii Baarlamaanka Federaalka uusan oggolaan ama uusan waqti ku darin xaalad deg deg ah, markaa xaaladda deg degga ah ma jireyso.	(6) Baarlamaanka Federaalka wuxuu oggolaan karaa xaladda deg-degga ah oo aan ka badnayn muddo saddex bilood.	Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaana lagu sameeyay soo koobid.
5) Ku-dhawaaqista xaaladda deg degga ah waxaa ay laanta fulinta siin kartaa awoodo gaar ah oo loogu baahan yahay wax ka qabashada xaaladda oo keliya.	(7) Haddiise ay baahi timaado, xukuumadda waxay Baarlamaanka ka codsan kartaa muddo kordhin aan ka badanayn saddex bilood, waana inay oggoladaan saddex meelood hal meel (2/3) tirada guud ee xildhibaanada Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.	Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa loo qoray hab qaanuuneed.
6) Awoodaha lagu bixiyo xaaladda deg degga ah gudaheeda kuma jirayaan awoodo loogu xadgudbayo xuquuqaha ku jira dastuurkan, haddii xadgudubkaasi aanu gebi ahaanba	(8) Haddii Baarlamaanku uu diido muddo kordhinta xaaladda deg-degga ah, waxaa istaageysa sii-socoshada xaaladda degdegga, mana yeelaneyso raad sharci ah.	Fiiri faallada faqradda 6aad

lagamamaarman u ahayn ujeeddooyinka wax ka qabashada xaaladda deg degga ah.		
7) Saxnaanta ku-dhawaaqista xaaladda deg degga ah, iyo habraacyada loo maro ku dhawaaqista, waxaa lala tiigsan karaa maxkamad.	(9) Duridda sharciyadda ku-dhawaaqidda xaaladda degdegga ah iyo habraacyada loo maray ama ku sargo'naashaha ama u dhigmidda inta loo baahan yahay in lagu xalliyo xaaladdaas, waxaa la horgeyn karaa oo kaliya Maxkamadda Dastuurka.	Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuneed waxaana lagu kordhiyay in sharciyadda ama u dhigmidda xaaladda lala aadayo maxkamadda dastuurka.
	<b>Qodobka 187aad: Ku Dhawaaqidda Xaalad Dagaal</b>	<b>Qodob cusub:</b>
	(1) Ku dhawaaqidda xaalad dagaal waxaa lagu sameynayaa xeer madaxweyne isaga oo tixgelinaya soojeedinta Golaha Wasiirrada, kaddib marka uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyo. Dhammaadka xaaladda dagaalka waxaa go'aan ka gaaraya Golaha Amniga Qaranka oo noqonaya Golaha Dagaalka ee Qaranka isaga oo si joogto ah ugu warbixinaya goleyaasha Baarlamaanka Federaalka.	Qodobkan waxay xeerinaysaa ku dhawaaqista xaaladda dagaal.
	(2) Marka xaalad dagaal ama weerar lagu dhawaaqo, Golaha Dagaalka ee Qaranka waxa uu yeelanayaa awoodo la mid ah awoodaha xaaladaha degdegga ah. Marka Golaha Wasiirradu ay soojeediyaan, tillaabooyinka lagama maarmaanka u ah maareynta xaaladda dagaalka ama weerarka waxaa lagu soo saarayaa xeer madaxweyne.	

<b>CUTUBKA SADDEX IYO TOBNAAD: QODOBBO GUUD</b>		
<b>Asalka Dastuurka KMG</b>	<b>Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD uuna ansixiyay Guddiga Lasocodka</b>	<b>FAALO</b>
<b>CUTUBKA 15AAD: QODOBBADA KAMA DAMBYSTA AH IYO KUWA-KU-MEEL-GAARKA AH</b>	<b>CUTUBKA SADDEX IYO TOBNAAD: QODOBBO GUUD</b>	Cinwaanka cutubkan waxaa lagu sameeyay wax ka bedel, waxaana laga dhigay Qodobbo guud halki uu ka ahaa qodobada kama dambaysta ah iyo kuwa ku meel gaarka ah.
<b>Madaxa koowaad: Wax-kabeddelka Dastuurka</b>		Madaxan cinwaankiisa waxba lagama beddelin
<b>Qodobka 132aad : Qodobada ku dabaqma wax-ka-beddelka Dastuurka ee lasoo jeediyay dhammaadka xilliga koowaad ee Baarlamanka Federaalka</b>	<b>Qodobka 188aad: Habraaca Wax-kabeddelka Dastuurka</b>	Waxaa qodobkaan si faahfaahsan loogu dhigay habraaca wax ka bedelka Dastuurka, cidda soo jedinaysaa, habraaca looga doodayo iyo sida loo ansixinayo iyo cidda leh ansixinta wax ka belidda iyo kaabidda qodob ama qodobada Dastuurka.
	(1) Dastuurkan waxaa wax looga beddeli karaa oo keliya si waafaqsan habraacyada ku xusan Cutubkan.	Qodobkani wuxuu dejinayaa nidaam wax-kabeddel oo dheellitiran isla markaana loo dhan yahay, kaas oo u oggolaanaya baarlamaanka, xukuumadda, dawlad goboleedyada iyo dadweynaha inay soo jeediyaan wax-ka-beddelka. Wuxuu bixinayaa habab lagu ilaalinayo dastuurka iyadoo loo marayo shuruudaha hubinta garsoorka,
(1) Marka laga soo tago faqradda (2), ka hor ama ka damba inta aanu dhammaan muddo xileedka koowaad ee Baarlamanka Federaalka, Midkoodna Labada aqal ee Baarlamaanka ma soo jeedin karo wax-ka-beddelka Mabaadi'da aasaasiga ah ee ku xusan cutubka laad ee dastuurkan,	(2) Wax-kabeddelka qodob ama qayb kamid ah Dastuurka waxaa soojeedin kara: a) Saddex meelood meel (1/3) tirada Guud ee xubnaha Golaha Shacabka ama Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; b) Golaha Wasiirrada; c) Ugu yaraan mid ka mid ah Dawlad Gobleedyada;	

	<p>d) Madaxda fulinta ee heer federal iyo heer dawlad goboleed oo ku heshiisa in qodob ama arrimaha ku xusan jadwalka 2aad ee lagu sameeyey wax-kabeddel;</p> <p>e) Codsiga ay saxiixeen ugu yaraan 150,000 codbixiyaal diiwaangashan ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.</p>	<p>taas oo xaqiijinaysa hufnaan iyo joogteyn dastuuri ah. Adkaynta mabaadi'da asaasiga ah ee dastuurka waxay ka dhowraysaa qaab-dhismeedka aasaasiga ah ee qaranka waxyeello.</p>
	<p>(3) Waxaa waajib ah in soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurku ay sababaysan tahay isla-markaana ay saxiixaan dhinacyada soo gudbiyay.</p>	<p>Faqraddan waxay xeerinaysa in soojeedintu ay saxiixaan dhinacyadu.</p>
	<p>(4) Wax-kabeddelka qodob ama qodobbada Dastuurka uu soojeediyey Dawlad Goboleed, inta aan la horgayn Baarlamaanka Federaalka, waa in marka hore la soo marsiiyaa Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka soojeediyay ayna ku oggolaadaan soojeedintaas boqolkiiba konton hal dheeri (50%+1).</p>	<p>Faqraddan waxay tilmaamaysaa in wax-kabeddelka uu soojeediyey dawlad goboleed, waa in golaha wakiilada dawlad goboleedkaas uu oggolaadaa.</p>
	<p>(5) Wax-kabeddelka ku yimaada heshiis siyaasadeed ee u dhexeeya madaxda fulinta ee heer federaal iyo heer dawlad goboleed waa in heshiiskas ay wada saxiixan dhammaan madaxda fulinta dawlad goboleedyada iyo madaxda fulinta ee heer federaal, haddii heshiiskaas u la xiriira jadwalka 2aad ee astaynta awoodaha, waxaa heshiiskaas uu ku ansaxayaa oggolaansha boqolkiiba konton hal dheeri (50%+1) ee labada gole ee Baarlamaanka Federaalka, balse haddii uu la xiriiro qodob ka mid ah dastuurkan, heshiiskaas waxaa la raacayaa habraaca ku xusan faqradda 8aad ee qodobkan.</p>	<p>Faqraddan waxay xeerinaysa in heshiisyo siyaasadeed la gaari karo ee la xiriira astaynta awoodaha iyo qodobbada kale ee Dastuurka.</p>
	<p>(6) Lama oggola soojeedinta wax-kabeddelid kasta ee la xiriira mabaadi'da asaasiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sida ku cad Qodobbada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka Federaalka.</p>	<p>Faqraddan waxay reebaysaa wax-kabeddelka mabaadi'da aasaasiga ah ee Dastuurka.</p>

	(7) Waa in Gole kasta oo ka tirsan Barlamaanka Federaalka Soomaaliya uu ku ansixiyaa soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka boqolkiiba konton hal dheeri (50%+1) ee Aqal kasta inta aan la bilaabin doodda wax-ka-beddelka Dastuurka.	Faqradan waxay tilmaamaysaa in Gole kasta uu ku ansixiyo soojeedinta boqolkiiba konton hal dheeri (50%+1) ee Aqal kasta inta aan la bilaabin doodda wax-ka-beddelka Dastuurka.
	(8) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in uu xaqiijiyaa in lala sameeyey latashiyo, marka la diyaarinayo soojeedinta, si waafaqsan cutubkan.	Faqraddan waxay xeerinaysaa in muhiimtahay in la qabto latashiyo, ka hor ansixinta soojeedinta
	(9) Wax-kabeddelka qodob ama qodobbada Dastuurka waxay ku ansaxaysaa, marka uu gole kasta ku ansaxiyo saddex meelood labo meel (2/3) codka xubnihiisa.	Faqraddan waxay xeerinaysaa in loo baahanyahay seddex meelood labo meel (2/3) codka xubnaha gole walbe sii u u meelmaro wax-kabeddelka.
	(10) Haddii Baarlamaanka Federaalka uu laalo soojeedinta wax-kabeddelka ama kaabidda Dastuurka, waxaa reeban in soojeedintaas dib loogu soo celiyo ilaa ay ka soo wareegto muddo hal sano iyo bar ah.	Faqraddan waxay reebaysaa in dib loo soo cesho soojeedin uu BFS uu diiday muddo hal sano iyo bar ah.
	(11) Marka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalku uu ansixiyo soojeedinta wax-kabeddelka ama kaabidda Dastuurka ayna Maxkamadda Dastuurka xaqiijiso ansaxnimada wax-kabeddelka Dastuurka, waxaa xeer Madaxweyne ku soo saaraya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	Faqraddan waxay tilmaamaysaa dhaqangelidda waxka beddelka.
(2) Iyadoo shardi ahaan la eegayo Qodobka laad, isla markaana laga reebayo wixii isbeddel ah ee lagu sameynayo xuduudaha maamul goboleedyada marka la eego qodobka 49aad, Aqal ka mid ah Baarlamaanka Federaalku waxaa uu soo		<b>Faqraddan waa la tiray,</b> waxaana lagu daray nuxurkeeda faqradaha qodobkan.

jeedin karaa wax-ka-beddelka Dastuurka habka ee ku sugan qodob hoosaadyada iyadoo la raacayo nidaamka ay dhigayaan faracyada Qodobbada (3) ilaa (9).		
(3) Dawladda Federaalka ama tan gobolada, xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka ama codsi ay saxiixeen ugu yaraan 40,000 oo muwaadiniin ah ayaa lagu bilaabi karaa habraaca wax-ka-beddelka .		<b>Faqraddan waa la tiray,</b> waxaana lagu daray nuxurkeeda faqrada qodobkan
(4) Cidda u doodeysa wax-ka-beddelka Dastuurka hab waafaqsan faqrada (2) waxay soo jeedin karaan nooca wax-ka-beddelka ay rabaan iyaga oo hor keenaya mid ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka.		<b>Faqraddan waa la tiray,</b> waxaana lagu daray nuxurkeeda faqrada qodobkan.
(5) Haddii badiba xubnaha aqalka wax-ka-beddelka la soo jeediyay ee Dastuurka la horkeenaya ay aqbalaan wax-ka-beddelkaas marka koowaad ama marka xigta ee ay akhriyaan, guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya waxa uu mid kasta magacaabayaa 10 xubnood oo aqalkiisa ka tirsan oo ka mid noqdaguddi wadajir ah oo ka kooban labada aqal.		<b>Faqraddan waa la tiray,</b> waxaana lagu daray nuxurkeeda faqrada qodobkan.
(6) Guddiga wadajirka ah ee lagu magacaabay hab waafaqsan faqrada 5 waxay: a. Dib-u-eegis ku samayn doonaan soo jeedinta ku saabsan wax-ka-beddelka;		<b>Faqraddan waa la tiray,</b> waxaana lagu daray nuxurkeeda faqrada qodobkan.

<p>b. Dadka ku wargalin doonaan soo jeedinta;</p> <p>c. Hubin doonaan in ay jirto fursad dad weyne oo ku filan in lagaga doodo;</p> <p>d. La tashan doonaan xubnaha dadwaynaha;</p> <p>e. Hubin doonaan in xubnaha dadwaynuhu helaan fursad ku filan oo ay ugu soo bandhigi karaan faalooyinkooda iyo soo jeedinahooda guddiga wadajirka ah; iyo</p> <p>f. Kala shaqeyn doonaan sharci-dejinta maamul goboleedyada xubnaha ka ah federaalka iyo in lagu daro wixii maamul goboleedyadu soo gudbiyeen oo la is-waafajiyay soo jeedinta wax-ka-beddelka, goorta arrini taabanayso danaha gobolka.</p>		
<p>(7) Laba bilood gudahood markii la magacaabay, guddiga wadajirka ahi waxay warbixin u gudbin doonaan midkasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah.</p>		<p><b>Faqraddan waa la tiray,</b> waxaana lagu daray nuxurkeeda faqrada qodobkan.</p>
<p>(8) Baarlamaanka Federaalku waxaa uu aqbalayaa wax-ka-beddelka la soo jeediyay kaliya intii lagu ansixiyay cod kama danbaysa ka dib codkaasoo ay u qaadeen ugu yaraan sadex meelood laba meelood xubnaha jira aqalka shacabka, iyo cod kama dambays ah oo ay u qaadeen ugu yaraan</p>		<p><b>Faqraddan waa la tiray,</b> waxaana lagu daray nuxurkeeda faqrada qodobkan.</p>

sadex meelood laba meelood xubnaha jira ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka.		
(9) (Aqalka Baarlamaanka, waxa uu cod kama dambays ah u qaadi karaa sadex bilood iyo kabadan marka ay ka soo wareegto warbixinta Guddiga wadajirka ah sida uu dhigayo faqradda (7).		<b>Faqraddan waa la tiray,</b> waxaana lagu daray nuxurkeeda faqradda qodobkan.
(10) Haddii baarlamaanku ansixiyo hal iyo ka badan oo waxka beddelada la soo jeediyay ah hab waafaqsan qodobkan iyo qodobka 136 ee khuseeya dibu eegista Dastuurka kama dambaynta ah, waxa loo qaadi doonaa afti dastuurka wax-ka-beddelka lagu sameeyey.		Faqraddan waa la tiray, waxaana lagu daray nuxurkeeda faqradda qodobkan.
	<b>Qodobka 189aad: Sarreynta iyo Sii-socoshada Sharciyeed ee Dastuurka</b>	<b>Qodob Cusub</b>
	(1) Inta Dastuurka si kamadambays ah loogu ansixinayo afti dadweyne oo heer qaran ah, Dastuurkan wuxuu ahaanayaa xeerka ugu sarreeya ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	Qodobkani wuxuu xoojinayaa awoodda Dastuurka inta lagu jiro xilliga kala guurka, isagoo hubinaya inay hay'adaha dawladdu sii shaqeeyaan iyadoon la kulmin firaq sharci. Wuxuu ka tarjumayaa hannaanka caadiga ah ee xilliyada kala guurka, isagoo ka hortagaya hubanti la'aan ama carqalad maamul. Sidoo kale, wuxuu kalsooni siinayaa dadweynaha iyo hay'adaha in geeddi-socodyada socda ay weli ansax yihiin.
	(2) Dhammaan hay'adaha, xafiisyada iyo awoodaha lagu aasaasay Dastuurkan waxay sii wadi doonaan ku dhaqanka awoodahooda iyo gudashada waajibaadkooda muddada kalaguurka.	
	(3) Qabasho la'aanta aftida dadweyne ee dastuurkan ma saamaynayso ansaxnimada xeerarka, go'aannada ama habraacyada lagu fuliyey si waafaqsan Dastuurkan.	

	<b>Qodobka 190aad: Sii-socoshada iyo Dib-u-eegista Xeer Jira</b>	<b>Qodob Cusub</b>
	(1) Dhammaan xeerarka ee dhaqangalay ka hor ansixinta Dastuurkan waxay sii ahaanayaan kuwo lagu dhaqmo inta laga dhammaystirayo dib-u-eegistooda sida ugu dhakhsaha badan si ay ula jaanqaadayaan Dastuurkan.	Qodobkani wuxuu bixinayaa hannaanka dib loogu eegayo xeerarka hadda jira si loo hubiyo inay waafaqsan yihiin Dastuurka.
	(2) Dhammaan tallaabooyinka maamul ee aan waafaqsaneyn dastuurkan la ansixiyey waa in la waafajiyo Dastuurka, haddii tallaabadaas maamul ay sii ahaato mid khilaafsan Dastuurkan waa mid aan waxba ka jirin, muddo lix bilood ah.	Marka la dejiyo waqti kama dambays ah oo saddex sano ah iyo in mas'uuliyadda shaqadaas lagu wareejiyo Guddiga Hirgelinta Dastuurka, waxay ka hortagaysaa dib-u-dhacyo sharci-dejineed oo aan dhammaad lahayn, waxayna taageeraysaa waafajinta xeerka ee xilliga ku habboon. Tani waxay muhiim u tahay abuurista nidaam sharciyeed oo dastuuri ah oo isku xiran
	(3) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu dib u eegayaa dhammaan xeerarkii horey u jiray, wuxuuna ansixinayaa wax-kabeddellada lagama maarmaanka ah muddo shan (5) sano gudahood ah laga bilaabo taariikhda uu Dastuurkani dhaqangalo.	
	(4) Guddiga Madaxbannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ee lagu aasaasay cutubkan wuxuu ka taageerayaa Baarlamaanka dib-u-eegista xeerarka, wuxuuna diyaarinayaa warbixinno oo uu gudbinayo Guddiga Lasocodka Baarlamaanka.	
<b>Qodobka 133aad: Qodobada ku dabaqma wax ka badelka Dastuurka ku meel gaarka ah Jadwalka koowaad (C), ama sharci lagu xusay jadwalka koowaad (D) ee Dastuurkan ka hor inta aanay dhammaan xilliga koowaad ee Baarlamaanka Federaalka: Guddida la socodka/ kormeerka</b>	<b>Qodobka 191aad: Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka;</b>	Waxaa lagu sameeyey wax-kabeddel cinwaanka qodobkan oo waxaa laga dhigay
(1) Qodobkan iyo Qodobka 134: a. 'Guddiga la Socodka' waxaa loola jeedaa Guddiga ku meel gaarka ah ee dib-u-		

<p>eegista iyo lasocodka hirgalinta Dastuurka;</p> <p>b. 'Guddiga Dib-u-eegis iyo Hirgelinta' waxaa loola jeedaa Guddiga Madaxa Bannaan ee dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka ku meel gaarka ah</p>		
<p>(2) Dastuurkani waxaa uu abuurayaa Guddi Lasocod kaasi oo ah Guddi ka tirsan Baarlamaanka Federaalka.</p> <p>a. Aqal kasta oo Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ka tirsan waxaa uu u dooranayaa shan ka mid ah xubnihiisu in ay ka qayb noqdaan xubnaha Guddiga La-socodka. Intaa waxaa dheer, maamul kasta oo jira qaybna ka ah Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya kaasoo u qalma in uu noqdo maamuul ka mid ah Federaal marka la fiiriyo Dastuurka Soomaaliya waxa uu soo magacaabi doonaa hal ergay oo ka socda maamulka kaasoo xubin ka noqonaya Gudida la-socodka.</p> <p>b. Guddiga L-socodku waxay la socon doonaan, tilmaami doonnaan ansixinna doonaan hawlaha Guddiga dib-u-eegista iyo Hirgalinta, iyo, guud ahaan hirgalinta Dastuurka.</p>	<p>(1) Guddiga Lasocodka wuxuu ka koobanyahay:</p> <p>a) Shan (5) xubnood oo uu dooranayo Golaha Shacabka;</p> <p>b) Shan (5) xubnood oo uu dooranayo Aqalka Sare;</p> <p>c) Hal (1) ergay oo ka socda Dawlad Goboleed kasta; iyo</p> <p>d) Hal xubin oo ka socda Caasimadda Jamhuuriyadda.</p>	<p>Qodobkani wuxuu dhisayaa Guddiga La socodka ee Waafajinta.</p>

(3) Xubnaha Guddiga la-socodku waxay dooran doonaan guddoomiyahooda iyaga oo ka dooranaya xubnaha Guddiga la-socodka.	(2) Xubnaha Guddiga Lasocodka waxay dooran doonaan guddoonkooda.	Faqraddan sideedii ayaa loo qaatay
(4) Muddo aan ka badnayn bil markii Guddiga la-socodku ay doorteen Guddoomiyahooda, GuddigaLa-socodku waxay ku samaysan doonaan cod aqlabiyad ah xeerarka ay ku shaqaynayaan		Faqraddan waa la tiray
(5) Guddiga La-socodka/Kormeerka waxaa uu muddo ka dibba, uu Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgelinta u xilsaarayaa qoris shuruuc qabyo ah oo ku saleysan baahiyaha Jadwallada Koowaad (A) iyo Koowaad (B) iyo wixii kale ee baahiyo ah ee loo arko lagama maarmaan iyada oo la raacayo natiijada ka soo baxda ansaxinta ku-meelgaarka ah e Golaha Ansixinta Dastuurka ah ee Qaran sida uu dhigayo Borotokoolka Dhisaya Golaha Ansixinta Dastuurka Qaran.	(3) Guddiga Lasocodka wuxuu korjoogteynayaa jiheenayaana howlaha hirgelinta Dastuurka asagoo ka helaya taageero farsamo Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka arrimaha la xiriira in Dastuurrada Dawlad Goboleedyada la waafajiyo Dastuurka Federaalka.	Faqraddan waxaa lagu sameeyey siiqeyn
(6) Marka uu u xilsaarayo qoris hindise sharci qabyo ah ee lagu xusey faqradda (5), Guddiga Sixidda/ Kormeerka waxaa uu mashruuca mudnaan u kala siinayaa sida soo socota: Waxaa uu: a. Lafagurayaa mashruuca isaga oo ka eegaya dhibaataada bulsho ee wax-kabeddelka Dastuurka ee la soo jeediyey ama Mashruuca-sharci uu wax ka qabanayo;	(4) Guddigu Lasocodku wuxuu u xilsaarayaa Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka diyaarinta soojeedimaha wax-kabeddelka dastuurka haddii loo baahdo, ka hor aftida dadweynaha ee Dastuurka;  (5) Guddiga Lasocodka wuxuu u diri karaa cilmibaarisyo iyo warbixinno la xiriira hawsha waajifijinta Dastuurada dawlad goboleedyada dastuurka Federaalka;	Faqraddan waxay tilmaamaysa qaar kamid ah hawlaha Guddiga La socodka.

<p>b. Siinayaa mudnaan sare hindise sharci qabyo ah oo higsanaya in uu beddelo hab-dhaqan/ dabeecad.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>i. Ammaanka qaranka, bedqabka dadweynaha, ilaalinta xuquuqaha Aadanaha ee aasaasiga ah, ama Deegaanka</li> <li>ii. Sinnaan la'aan dhinaca tayada nolosha ah ee qaybaha kala duwan ee dadka Soomaalida ah haysata, oo ay ka mid tahay sinnaan la'aanta dakhli, u sinnaan la'aanta daryeelka caafimaadka, iyo u sinnaan la'aanta waxbarashada;</li> <li>iii. Horumarka dhaqaale, oo ay ka mid tahay helidda shaqooyin, hubinta in qayb caddaalad ku dhisan oo ka mid ah faa'iidada ay helaan maalgeliyayaasha ajnebiga ah dib loogu maalgeliyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyo hubinta in Muwaadiniinta Soomaaliyeed ay helaan aqoonta ku saabsan, ayna helaan shaqooyin la xiriira adeegsiga tiknolojiyada cusub, iyo</li> <li>iv. In maaliyadda ummadda laga ilaaliyo musuq-maasuq iyo si xun u adeegsi.</li> </ul> <p>c. Siinayaa mudnaan tan ka yar mashaariicda ku saabsan dhibaato bulsho oo la xiriirta mas'uuliyad Wasaarad jirta marka laga reebo kuwa la</p>		
---	--	--

<p>xiriira dhibaatooyinka bulsho ee mudnaanta sare leh;</p> <p>d. Ilaa intii suuragal ah iyada oo sal looga dhigayo xisaabinta sax ah iyada oo la isu eegayo kharashka ku baxaya iyo faa'iidada bulshada ay ka heleyso, u qoondeeynaya mudnaan isu dhiganta mashaariicda sharci-qorista u eg in mudnaantoodu ay isku mid tahay</p> <p>e. Ku martiqaadaya Xubnaha labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya in ay ka munaaqashoodaan kala mudnaan-siinta wax-ka-beddelka Dastuurka iyo mashaariic-shuruuc la soo jeediyey;</p> <p>f. Sanad kasta ay Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya u gudbinayaan si uu u ansaxiyo, wax uga beddelo ama u diido, Barnaamij Qorista Shuruuc markaa jira ee mudnaanta leh ee ku saabsan wax-ka-beddel Dastuuri oo la soo jeediyey iyo mashaariic-sharci la soo jeediyey, si waafaqsan sida Guddiga Kormeerka/Sixidda uu mashaariicda u qoondeeyo in uu qoro Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgelinta, iyo in muddo ka dib uu wax ku daro ama wax ka dhimo barnaamijkaa hadba sida xaaladda markaa jirta ay keeneyso.</p>		
--	--	--

<p>(7) Inta Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgelinta, si waafaqsan faqradda (6), uu dhammeystirayo sharci qabyo ah la weydiistey in uu qoro, sida ku xusan Qodobka 134, waxaa uu Guddiga Kormeerka/ Sixidda u soo gudbinayaa si uu dib ugu eego wax-ka-beddelka qabyada ah ee Dastuurka ah ama mashruuca-sharci, oo ay la socoto Warbixinta lagu xusey Qodobka 134(7)(b).</p>		
<p>(8) Gudida lasocodku waxa ay:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>a. Dib-u-eegis gudaha ah ku sameynayaan Sharci qabyo ah oo la xiriira wax ka bedalka Dastuurka iyo warbixinta la socota hab waafaqsan faqradda 7;</li> <li>b. In dadweynaha ku wargaliso soo jeedinta iyo warbixinta;</li> <li>c. In ay hubiso in fursad ku filan oo dadweynuhu kaga doodi karaan jirto;</li> <li>d. In ay la tashato xubnaha dadwaynaha iyo xubnaha kale ee Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya;</li> <li>e. Hawl gali golayaasha sharci dejinta ee Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah federaalka kuna daraan waxyaalaha ay soo gudbiyeen oo lays waafajiyey wax ka badelka la soo jeediyey, haddii arrintu taabanayso danaha gobolka.</li> </ol>		
<p>(9) Haddii wada tashi ka dib sida ku xusan</p>		

<p>faqradda (8) guddiga lasocodku go'aamiso in ay ku darto soo jeedinno kala duwan wax-ka-beddelka Dastuurka ama sharci qabyo ah ee la soo jeeyay, ay ku celiyaan wax-ka-beddelka dastuurka la soo jeediyey ama sharci qabyo ah oo gudida dibu eegista iyo hirgalinta for redrafting, with instructions.</p>		
<p>(10) Haddii markaa ka dib marka la sameeyo latashiga ku xusan faqradda (8) guddida la socodku go'aamiso wax-ka-beddelka Dastuurka ee la soo jeediyay ama sharci qabyo ah si loo ansixiyo, waxa ay u gudbin doontaa wax-ka-beddelka Dastuurka ee la soo jeediyay guddoomiyaha aqalka shacabka, iyada oo warbixintuna la socota, si hore loogu sii socdo hab wafaqsan Dastuurkan.</p>		
<p>(11) Guddida la -socodku wax ay ku wargalin doontaa saddexdii biloodba mar labada aqal horumarka laga sameeyey dhamaystirka mashruuca lagu xusay jadwalka kow (C) iyo kow (D) iyo sida uu dhigayo marka la fiiriyo wixii ka soo baxay golaha Dastuurka ee qaranka sida ku dhigan xeerka lagu abuurayo golaha Dastuurka ee qaranka</p>	<p>(6) Guddida Lasocodku waxuu warbixin siinayaa labada Gole ee Baarlamaanka iyo Goleyaasha Wakiilada horumarka laga sameeyey waafajinta Dastuurka Dawlad Goboleedyada ee Dastuurka Federaalka.</p>	<p>Faqraddan waxaa lagu sameeyey dib-u-siiqeyn</p>

<p>(12) Guddiga la socodka/kormeerka waxaa muddadiisu dhammaaneysaa marka lagu ansixiyo kala dirkiisa aqlabiyad fudud (50% lagu daray 1) tirada mid kasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya,</p>		
	<p>(7) Guddiga Lasocodka waa inuu korjoogteeyaa diyaarinta soojeedinno iswaafajin oo ku saabsan dastuurka Dawlad Goboleed kasta, muddo shan (5) sano gudahood ah laga billaabo taariikhda uu Dastuurkan dhaqangalo.</p>	<p>Qodobkan wuxuuna xoojinayaa isku-duubnida federaalka, isagoo dalbanaya in dastuurada Dowlad Goboleedada xubnaha ka ah Federaalka ay waafaqsanaadaan Dastuurka Federaalka. Marka lagu daro hubinta Maxkamadda Dastuuriga ah iyo dejinta muddo saddex sano ah, qodobkani wuxuu xaddidayaa is-mari-waaga siyaasadeed, wuxuuna bixinayaa xeerar hagaya geeddi-socodka waafajinta, kuwaas oo udub-dhexaad u ah ku-dhaqanka federaalka ee deggan.</p>
	<p>(8) Dastuurrada Dawlad Goboleedyada ee dib-u-eegis lagu sameeyo si waafaqsan qodobkan waa in loo gudbiyaa Maxkamadda Dastuuriga ah si ay u xaqiijiso waafaqsanaantooda ka hor inta aysan dhaqangelin.</p>	<p><b>Faqrad cusub.</b> Faqraddan waxay faraysaa in Dastuurada dawlad goboleedyada ee la waafajiyey dastuurka loo gudbiyo Maxkamadda Dastuurka</p>

	(9) Khilaaf kasta oo ka dhasha habraaca waafajinta waxa go'aan kama dambays ah ka gaaraysa Maxkamadda Dastuuriga ah.	<b>Faqrad cusub.</b> Faqraddan waxay siinaysaa Maxkamadda Dastuurka go'aan ka gaarista khilaaf kasta oo ka dhasha habraaca waafajinta.
<b>Qodobka 134aad: Qaybaha ku dabaqma wax-ka-beddelka Dastuurka ee lasoo jeediyay ka hor inta aanay dhammaan muddada koowaad ee wakhtiga Baarlamaanka Federaalka: Guddiga dib-u-eegista iyo Hirgalinta</b>	<b>Qodobka 192aad: Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka</b>	Qodobkan waa qodobkii 134 ee Asalka Dastuurka
(1) Dastuurkani waxaa uu abuurayaa Guddiga ee dib-u-eegista iyo Hirgalinta iyaga oo ah guddi hoos tagaya guddida la socodka hab waafaqsan qodobka 133.		.
(2) Bilawga muddada xileed ee koowaad ee Aqalka Baarlamaanka Federaalka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, Wasiirka u xilsaaran ayaa u soo magacaabi doona Ra'iisul Wasaaraha shan xubnood oo ka mid noqon doona Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka kuwaasoo wasiirka u xilsaaran uu kasoo xulayo liis ay soo diyaariyeen Golaha Wasiirrada. Waxaa intaa dheer, Dawlad goboleedyada jira ee Xubnaha ka ah Federaalku waa in ay u soo magacaabaan mid waliba hal ergay oo kale oo dheeraad ah guddida dibu eegista iyo hirgalinta, taasoo ku salaysan isla shuruudda doorashada.	(1) Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxa uu ka koobanyahay shan (5) xubnood ee uu soo jeedinayo Golaha Wasiirrada, iyo hal ergay oo ay soo magacaabaan Dawlad Goboleedyada iyo Caasimadda Jamhuuriyadda.	Faqraddan waxay xeerinaysaa dhismaha Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka

<p>(3) Wasiirka u xilsaaran waxaa uu dooran doonaa magacaabista qof aan xubin baarlamaan ahayn, kaasoo buuxiya shuruudaha soo socda oo lagu magacaabay Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgalinta:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>a. Leh anshax iyo sumcad wanaagsan;</li> <li>b. Shahaado ka sita jaamacad la aqoonsan yahay;</li> <li>c. Ku muujiyey karti heerar sare dhinaca maamulka dadweynaha ama xagga sharciga ee Soomaliya dhexdeeda, ama</li> <li>d. In uu u leeyahay aqoon iyo khibrad ugu yaraan toban sanno arrimo la xiriira mid ka mid ah kuwa soo socda: <ol style="list-style-type: none"> <li>i. Sharciga,</li> <li>ii. Maamulka dadweynaha,</li> <li>iii. Dhaqaalaha,</li> <li>iv. Jinsiga</li> <li>v. Xuquuqda Aadanaha.</li> </ol> </li> <li>e. In uu shaqo wanaagsan ka soo qabtay shaqadiisa ama majaalka uu ku takhasusay qofka la magacaabay. iyo</li> <li>f. In uu leeyahay waaya-aragnimo badan oo la xiiriita sharci qorista.</li> </ol>	<p>(2) Xubnaha Guddiga Madaxabannaan waa in ay leeyhiin shuruudaha soo socda qodobka 41aad ee Dastuurka.</p>	<p>Faqraddan waxay tilmaamaysaa shuruudaha xubnaha Guddiga.</p>
---	--	---

<p>(4) Ra'isul Wasaaruhu waxaa uu soo hordhigi doonaa magacyada dadkii la soo magacaabay mid kasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya 15 maalmood gudahood marka Golaha Wasiirrada la abuurto, iyaga oo afar iyo toban cisho gudahood ku ansixin doona ama ku diidi doona mid ama ka badan oo ka mid ah dadka la soo magacaabay.</p>		<p><b>Faqraddan waa la tiray</b> nuxurkeedana waxa lagu daray faqradda laad ee qodobkan.</p>
<p>(5) Haddii mid ka mid ah labada aqal diido qof la soo magacaabay, Wasiirka u xilsaaran waxaa uu si waafaqsan faqradda (3) u soo magacaabi doonaa beddelkii qofkaas, intaa ka dibna waxaa uu raaci doonaa habraaca ku dhigan faqradda 4 ilaa 6.</p>		<p>Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.</p>
<p>(6) Ka dib marka Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya uu doorto shan qof oo lasoo magacaabay hab waafaqsan qodob-hoosaadyadaa (4) iyo (5) , Ra'isul wasaaruhu waxaa uu u astayn doonaa mid ka mid ah dadkaas la soo magacaabay Guddoomiye, waxaanu u diri doonaa magacyadooda madaxwaynaha isagoo isna u magacaabi doona Guddoomiye qofka Ra'isul wasaaruhu uu u asteeyey, labada kalena, Xubno ka tirsan Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgalinta.</p>	<p>(3) Shanta (5) xubnood uu ku jiro Guddoomiyaha Guddiga waxaa soojeedinaya Golaha Wasiirrada, waxaana ansixinaya Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaana meelmarinayaa xeer uu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya</p>	<p>Faqraddan nuxurkeeda waxaba iskama beddelin, keliya waxaa lagu sameeyay Faqraddan sideedii ayaa loo qaatay, waxaa lagu sameeyey toosin.</p>

<p>(7) Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgalintu waa in ay:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>a. Sida laga yaabo in uu Guddiga La-Socodku amro, waxaa loo baahan karaa in wax laga beddelo Dastuurka sida ku qoran Jadwalka Koowaad (C), ama la soo jeediyo sharci qabyo ah sida lagu magcaabay Jadwalka (D), ama sidii kale ee hadba loo baahdo iyada oo daba socota waxa ka soo baxa Golaha Ta'isiisiga ah ee Qaranka</li> <li>b. diyaariyaan warbixin daraasadeed oo lagu lifaaqo wax-ka-beddelka lasoo jeediyey ama sharci qabyo ah. Warbixintaasoo, hab waafaqsan cadaymaha, sababaynaysa waxka bedelka lasoo jeediyey ama mashruuca sharci kana saadaalinaysa ixtimaalka in wax-ka-beddelka lasoo jeediyay ama mashruuca ay ka dhalan karto hab dhaqankii la rabay, iyo in hab dhaqankaasi uu dib u qaabayn ku sameeyo dhibaataada bulsho ee wax-ka-beddelka la soo jeediyey ama mashruuca sharci uu higsanayo;</li> <li>c. sameeyaan daraasadda sharci iyo ta xaqiiqo ee lama huraanka ah si ay u gudato xilalka ku xusan baragaraafyada (a) iyo (b);</li> <li>d. sameeyaan hab waafaqsan Qodobka 133 (7), u gudbi guddiga la socodka wax-ka-</li> </ol>	<p>(4) Guddiga Madaxabanaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxa uu qabanayaa hawlaha soo socda:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>a) Diyaarinta soojeedimaha wax-kabeddelka dastuurka haddii loo baahdo, ka hor aftida dadweynaha ee Dastuurka;</li> <li>b) Isku-dubarididda hirgelinta Dastuurkan;</li> <li>c) Taageeridda dib-u-habaynta xeerarka ee ku xusan cutubkan.</li> <li>d) Taageeridda waafajinta dastuurada Dawlad Goboleedyada Federaalka.</li> <li>e) Diyaarinta warbixinno dadweyne oo saddexdii biloodba mar ah oo ku saabsan horumarka hirgelinta;</li> <li>f) Siinta talo Baarlamaanka, Golaha Wasiirrada, iyo Dawlad Goboleedyada ee ku saabsan arrimaha la xiriira hirgelinta; iyo</li> <li>g) Hawlaha uu xilsaaro Guddiga La socodka ee la xiriira hirgelinta dastuurka.</li> </ol>	<p>Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.</p>
---	--	---

<p>beddelka lasoo jeediyay oo dhamaystiran ama mashruuca sharci la-socda warbixininta lagu xusuy baragaraafka (b) u gudbiyaan Guddiga La-socodka;</p> <p>e. warbixin ka siiso sadexdii biloodba mar ama marka ay ka codsato Guddiga la socodka horumarka laga gaarey dib-u-eegista iyo hirgalinta lagu Dastuurkan iyo caqabad kasta oo ka hor imanaysa geeddi-socodka dib-u-eegista iyo hirgalinta.</p> <p>f. in ay Guddoomiyaha Garsoorka ee Maxkamadda Dastuurka kala shaqeeyaan dastuurinimada soo-jeedinta, iyo</p> <p>g. iyada oo loo fiirinayo hadba inta miisaaniyaddu le'eg tahay, in la qoro shaqaale ku filan in ay u guttaan xilkooda hab waafaqsan Dastuurkan.</p>		
<p><b>Qodobka 135aad: Xilalka iyo Muddeynta Hay'adaha mudnaanta sare leh iyo Guddiyada Madaxa Bannaan ee uu Baarlamaanka Federaalku ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya Aasaasayo</b></p>		<p>Waxaa la soo jeedinayaa in la laalo qodobkaan maadaama muddadii loo qabtay guddiyada iyo xafiisyada la dhaafay, sidoo kale la dhisay guddiyada iyo xafiisyada qaar.</p>
<p>(1) Haddii aan si kale loogu sheegin Dastuurkan, Baarlamaanka Federaalku ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya wuxuu magacaabayaa xubnno aan tiradoodu</p>		<p>Sababaha Soojeedinta ayaa ku salaysan in uu dhammaaday xilliga kowaad ee Baarlamaanka lagu doortay Dastuurka sida ku meelgaarka ah una igmanaa dib u-</p>

<p>ka badnayn sagaal oo ay yeelan doonaan guddi walba oo Madax Bannaani.</p>		<p>eegista Dastuurka ku meelgaarka ah sida awgeedna aan loo baahnayn maadaama Baarlamaankaas xilligiisa uu dhammaaday.</p>
<p>(2) Baarlamaanka Federaalku wuxuu asaasayaa hay'adahan iyo Guddiyadan Madaxa Bannaan ee soo socda iyadoo muddeeynta halkan ku cadna la raacayo, kuwaasoo hirgelaya marka la aasaaso Golaha Wasiirrada:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>a. Golaha Adeegga Garsoorka - 30 maalmood</li> <li>b. Maxkamadda Dastuurka - 60 maalmood</li> <li>c. Guddiga Xuquuqul Insaanka, Ilaaliyaha/kormeeraha (Ombudsman), Guddiga Amaanka Qaranka, Guddiga Ilaalinta/dabagalka nabadgelyada ee rayidka ah - 45 maalmood</li> <li>d. Guddiga Adeegga Baarlamaanka - 15 maalmood</li> <li>e. Guddiga Qaranka ee Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka iyo Guddiga Xuduudaha iyo Federaaleynta - 60 Maalmood.</li> <li>f. Guddiga ka Dhexeeya Dawlad Goboleedyada - 1 Sanno</li> <li>g. Guddiga Runta iyo Dib-u-heshiisiinta - 30 Maalmood</li> </ol>		<p>Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.</p>

<p>(3) Si hadaba loogu sahlo Baarlamaanka Federaalka ah in uu hawlihiisaa guto, Guddiga dib-u-eegista ee Farsamo ayaa soo diyaarinaya qoraalka sharciga loogu baahan yahay in lagu abuurto guddiyadaa iyadoo la raacayo Dastuurkan, si Guddiga Kormeerka iyo Guddiga dib-u-eegista iyo Hirgelintu ay u soo gabagabeeyaan uguna gudbiyaan Baarlamaanka Federaalka si uu uga sii baaran dego , si aan looga dib dhicin waqtiyada kama danbeysta ah ee ku cad faqradda (2) kore.</p>		<p>Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.</p>
<p><b>Qodobka 136aad: Qaadashada wax-kabeddelka Dastuurka inta lagu guda jiro muddo xileedka koowaad ee Aqalka Shacab; ansixinta Dastuur kama dambays ah</b></p>		
<p>(1) Inta lagu guda jiro muddo xileedka koowaad ee Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya, baarlamaanka Federaalku waxaa uu qaadan doonaa waxkabeddelka la soo jeediyay ee Dastuurka ku meel gaarka ah kaliya intii lagaga ansixiyay kadib cod kama dambays ah aqalka shacabka codkaasoo u dhigma sadex meeloodow laba meelood, iyo cod kama dambaysa ah oo ay u qaadaan Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah, codkaasoo ugu yaraan ah sadex meeloodow laba meelood xubnaha jira.</p>		<p>Sababaha Soojeedinta ayaa ku salaysan in uu dhammaaday xilliga kowaad ee Baarlamaanka lagu doortay Dastuurka sida ku meelgaarka ah una igmanaa dib u-eegista Dastuurka ku meelgaarka ah sida awgeedna aan loo baahnayn maadaama Baarlamaankaas xilligiisa uu dhammaaday.</p>
<p>(2) Afti la qabtay taasoo khusaysa Dastuurka ku meel gaarka ah wax laga bedelay, oo la qabto</p>		<p>Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.</p>

<p>dhammaadka mudada xilka ee koowaad ee Golaha Shacabka, codbixiyayaasha jamhuuriyadda Soomaaliya waxa ay ku qaadan karaan Dastuurka cusub cod aqlabiyad ah oo ay ku taageeraan wejiga kama dambaysta ah ee Dastuurkan.</p>		<p>Aftida waxaa looga hadli doonaa qodob gooni ah</p>
<p><b>Qodobka 137aad: Dhaqangelinta Dastuurka</b></p>		<p><b>Qodobkan nuxurkiisa waxaa lagu sheegey qodobka hoose</b></p>
<p>(1) Ka dib dhammaadka muddada koowaad ee Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalku waxaa uu dhisayaa Guddi dib-u-eegis ku sameeya hirgelinta iyo shagaynta Dastuurka jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya, marka lagu ansixiyo hab waafaqsan qodobka 136 ee ku saabsan qaadashada Dastuurka kama dambaysta ah, iyo in lala tashado dawlada xubnaha ka ah Federaalku ka koobanyahay iyo dadweynaha wax-ka-beddelidda in lagu sameeyaa ay suurto galka tahay.</p>		<p>Sababaha Soojeedinta ayaa ku salaysan in uu dhammaaday xilliga kowaad ee Baarlamaanka lagu doortay Dastuurka sida ku meelgaarka ah una igmanaa dib u-eegista Dastuurka ku meelgaarka ah sida awgeedna aan loo baahnayn maadaama xilligiisa uu dhammaaday.</p>
<p>(2) Lix bilood gudahood intii la magacaabay ka dib, guddigu waxaa uu u soo gudbin doonaa warbixintiisa golaha Baarlamaanka Federaalka iyo , dowlada Federaalka ka midka ah iyo dadwaynaha.</p>		<p>Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.</p>
<p>(3) Kaddib markuu uruuriyo kana, baaraan-dego aragtiyada maamulada Federaalka ka tirsan, dadwaynaha, iyo marka la qiimeeyo lalana socdo hirgalinta iyo dabaqaadda</p>		<p>Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.</p>

<p>Dastuurka kama dambaysta ah iyo muddo aan ka yarayn lix bilood ka hor inta aanay dhammaan mudada xilaka ee marka labaad ee Baarlamaanka Federaalka soomaliyeed, guddigu, iyaga oo la tashanaaya guddoomiyaha maxkamadda Dastuuriga ah waxa ay hubin doonaan in eray iyo ujeedaba laixtiraamo Dastuurka, wuxuuna Baarlamaanka Federaalka u soo gudbinayaa talooyinkiisa haddiiba ay jiraan, si uu wax uga beddelo Dastuurka iyadoo loo hab-raacayo qodobka 132aad ee dastuurkan</p>		
<p>(4) Haddii Baarlamaanku Federaalka ihi ansixiyo mid ama ka badan oo wax-ka-beddelka la soo jeediyay ah hab waafaqsan Qodobka 132aad, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee wax laga bedely;</p>		<p>Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.</p>
<p>(5) Haddii aqlabiyadda kuwa u codaynaya aftida lagu xusay faqradda (4) ay u codeeyaan Dastuurka wax-ka-beddelka lagu sameeyey, Dastuurkaasi waxa uu noqonayaa Dastuurka jamhuuriyadda faderaalka ah ee Soomaaliya.</p>		<p>Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.</p>
<p><b>Qodobka 138aad: Ka Hirgelyaaa dastuurkan</b></p>		<p>Soo-jeedinta wax ka bedelka Dastuurka Hirgelidda waxaa lagu bedelay dhaqangalka</p>
<p>(1) Dastuurkan waxa uu dhaqan galayaa maalinta ugu horeysa maalinta koowaad marka ay ansixiinaan golaha qaran ansixinta</p>		<p>Waxaa soo jeedinaynaa in lagu sameeyay dib u-eegis farsamo isagoo tirtiray faahfaahinadda</p>

<p>Dastuurka ah oo isugu yimid hab waafaqsan khariidada nabada, heshiisyadii garowe 1 iyo Graowe II, Gaalkacyo, Addis Ababa, wareegtadii madaxweynaha iyo kuwa kale ee khuseyso.</p>		<p>dheeraadka ah ee ku xusan Qodobkaan. Waxaa sidoo kale la soojeedinayaa in Dastuurka uu sii ahaado ku-meel-gaar illaa looga ansixiyo Afti Dadweyne taasoo la abuubulayo lana qabanayo marka la helo midnimo buuxda. Waxaa loo qaatay in la helo dabacsanaan lagu abaabulayo afti dadwayne oo lagu ansixinayo Dastuurka marka uu yimaado waqtiga ku haboon si looga hortago baahi joogta ah oo dib loogu dhigo afti dadwayne.</p>
<p>(2) Dhaqangalka qodobada la xiriira Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka meelaha lagu xusay Dastuurkan dib ayaa loo dhigay inta laga gaarayo sameynta dhamaan dawlada xubnaha ka ah dawladda Federaalka iyo inta kuwa matalaya loo dhaarinayo xilka ayagoo ah xubnaha ka tirsan xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka. Inta uu laalan yahay sameynta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, Golaha Shacabka ayaa qabanaya dhamaan waajibaadka iyo hawlaha Dastuurka siiyay Aqalka Sare wuxuuna u shaqeynayaa sida Baarlamaanka ka kooban Hal Aqal, si daacadnimo ku jirtana maanka ugu hayaan Mabaadii'da Asaasiga ah ee awood qeybsiga ee nidaamka Federaalka lagu qeexay Qodobka 3(3) ee Dastuurkan iyo danaha gobollada Soomaaliyeed marka la gaarayo go'aanada.</p>		<p>Faqraddan waa la dhaqan-geliyay aqalki sarena waa la dhisay.</p>

<b>Qodobka 139aad: Sharciyadda oo Weli Socda</b>		Wax ka bedelka Dastuurka e la soo jeediyay
Dhammaan xeerarka dhaqan galka ah ka hor inta aanu hirgalin waxa ay ahaanayaan qaar sii shaqeeya waxaana laga dhadhansan doonaa laguna dabaqi doonaa waxka beddeladaas, qaadashadaas, in la cayimo iyo in wax laga soo reebo hadba sida looga maarmi waayo si loo waafajiyo Dastuurkan ilaa goorta xeerarkaas wax-ka-beddel lagu samaynayo ama meesha laga saarayo.		Waxaa lagu sameeyay qodobkaan dib u qaabayn, waxaa sidoo kale qodobka lagu kordhiyay faqrad 2aad, taasoo tilmaamaysaa guddiga cusub ee lagu sheegay Qod.107 oo ay shaqadiisu noqonayso dib u habaynta shuruucdi dalka.
<b>Qodobka 140aad: Waajibaadka Caalamiga Ah</b>	<b>Qodobka 193aad: Waajibaadka Caalamiga Ah</b>	Cinwaanka Qodobka waxba lagama beddelin
Inta heshiiska wax waajibinaya ee jirey taariikhda uu Dastuurkan dhaqan gelayo uu waqtigiisu dhacayo ama wax laga beddelayo, waajibka heshiiskaa ka dhashey sidiisa ayuu u jirayaa		Faqraddan waa la tiray nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradaha hoose
		Qodobkani wuxuu caddeeyaa maqaamka ay heshiisyada caalamiga ahi ku dhex leeyihiin dalka, wuxuuna oggolaanayaa in dib-u-eegis dastuuri ah lagu sameeyo wixii ka horimanaya. Wuxuu bixinayaa dabacsanaan isagoo u oggolaanaya Baarlamaanka inay xeer dheeraad ah ka soo saaraan habraacyada heshiisyada, iyadoo isla markaana la xaqiijinayo sii jiritaanka xiriirka

		caalamiga ah. Kormeerka garsoorku wuxuu hubinayaa in si dheellitiran loo maareeyo khilaafaadka ka dhalan kara sharciga dalka iyo kan caalamiga ah.
	(1) Heshiisyada caalamiga ah ee uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka waxay qayb ka noqonayaan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay nidaaminaysaa in heshiisyada caalamiga ah ay noqonayaa xeerar kadib ansixinta BFS
	(2) Haddii heshiis la ansixiyey uu khilaafsan yahay Dastuurkan, Maxkamadda Dastuuriga ah ayaa go'aaminaysa jiritaanka iyo baaxadda khilaafkaas.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay xeerinaysaa in Maxkamadu ay leedahay go'aan ka gaarista heshiiska in u khilaafsanyahay Dastuurka.
	(3) Baarlamaanka Federaalka waxa uu soo saarayaa xeer nidaaminaya habraaca ansixinta, ku-darista xeerarka gudaha, iyo ka bixitaanka heshiisyada caalamiga ah.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay tilmaamaysa in BFS uu soo saarayo xeer nidaaminaya habraaca ansixinta heshiisyada caalamiga ah.
	(4) Waajibaadka caalamiga ah ee jira waxay ahaanayaan kuwo ku waajib ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ilaa ay Maxkamadda Dastuuriga ahi ku go'aamiso inay ka hor imanayaan Dastuurkan.	<b>Faqrad cusub:</b> Faqraddan waxay qeexaysaa in waajibaadka caalamiga ah ee jiray ahaanayaan kuwo ku waajib ah JFS.
<b>Qodobka 141aad: Aftiyaha</b>	<b>Qodobka 194aad: Dhaqangalka Dastuurka iyo Aftida</b>	Waxaa lagu mideeyay qodobkaan qodo.137, 141 ee asalka Dastuurka ee ka kala hadlayay dhaqan-galka Dastuurka iyo Aftida

<p>(1) Haddii ay noqoto in la qaado afti uu amray Dastuurkan ama sharci kale ama sababo kaleba loo qaadayo, cidda hirgalinaysa aftidu waa in ay hubisaa in aftida lagu hubiyo in dhammaan dadka codbixin karaya ay fursad u helaan ay ku muujiyaan aragtidooda si xor ah, toos ah, qarsoodina ah si waafaqsan sharci Baarlamaanku ansixin doono kaasoo sugaya hab raaca aftida.</p>	<p>(1) Dastuurka kama-dambaysta ah waxaa lagu ansixinayaa afti qaran, waana in dhammaan muwaaddiinta u diiwaangashan codbixiye ay fursad u helaan ay ku muujiyaan aragtidooda si xor ah, toos ah, qarsoodina ah si waafaqsan xeer Baarlamaanka Federalka ansixiyo kaasoo qeexaya habraaca aftida.</p>	<p>Faqraddan waxaa lagu sameey dib-u-siiqeyn</p>
<p>(2) Cidda hirgalinaysa aftidu waxay hubin doontaa in –</p> <p>a. Aftidu waa in ay u waydiisaa su'aasha i cad, hab loogu talagalay in lagu helo aragtida dhabta ah ee codbixiyaha iyada oo aanay daah saarayn arimaha ay tahay in cod bixiyuhu kala doorto; iyo</p> <p>b. Waa in aysan su'aalaha qaabka loogu dhigay warqadaha codeynta iyo habraaca aftiduba aysan ku hogaamineyn cod-bixiyaha.</p>	<p>(2) Afti waxaa la qabanayaa marka la xaqiijiyo in shuruudahan soo socda la buuxiyey:</p> <p>a) In maamul dawladeed oo shaqaynaya uu ka jiro Dawlad Goboleed kasta;</p> <p>b) In ugu yaraan 80% goobaha codbixinta ee qorshaysan dalka oo dhan ay yihiin kuwo ammaan ah oo la gaari karo;</p> <p>c) In la dhammaystiray diiwaanka codbixiyeyaasha qaranka isla markaana la hubiyey; iyo</p> <p>d) In Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha uu si buuxda u hawlgalayo.</p>	<p>Qodobkani wuxuu dejinayaa shuruudo cad oo la cabbiri karo oo lagu qabanayo aftida, isagoo yareynaya madmadowga iyo ka hortagga dib-u-dhac aan loo baahnayn. Iyadoo la aasaasayo habab madax-bannaan iyo kuwo garsoor oo dib-u-eegis lagu sameeyo, waxay kor u qaadaysaa sharciyadda, amniga, iyo loo-dhammaanshaha hannaanka aftida. Wuxuu bixinayaa habraac dhab ah oo lagu dhammaystirayo geeddi-socodka kala-guurka dastuuriga ah</p>
	<p>(3) Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ayaa qiimaynaya heerka u diyaargarowga, wuxuuna warbixin u gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.</p>	
	<p>(4) Maxkamadda Dastuuriga ah waxay dib u eegi kartaa isla markaana xaqiijin kartaa go'aanka ku saabsan u diyaargarowga.</p>	

	(5) Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ayaa dejinaya taariikhda aftida muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah laga bilaabo marka la xaqiijiyo u diyaargarowga	
	(6) Dastuurka kama-dambaysta waxa uu ku ansaxayaa haddii ay u codeeyaan aqlabiyadda codadka saxda ah ee dalka oo dhan oo ay ku jiraan dhammaan Dawlad Goboleedyada.	
	(7) Waxaa reebban in afti dadweyne loo qaado wax-kabeddelka Dastuurka ama kaabidda inta laga sugayo midnimada dhuleed iyo midda dadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.	
	<b>Qodobka 195aad: Daahfurnaan iyo Ka Qaybgal Dadweyne</b>	<b>Qodob Cusub</b>
	1) Dhammaan hindiseyaasha xeer, soojeedinnada iswaafajinta, iyo wax-kabeddellada Dastuurka ee loo diyaarinayo si waafaqsan Cutubkan waa in lala tashadaa dadweynaha si ay aragti uga dhiibtaan.	Qodobkani wuxuu kor u qaadayaa sharciyadda demoqraadiyadda, isagoo dalbanaya in la baahiyo isla markaana lagala tashado dadweynaha geeddi-socodyada muhiimka ah ee dastuurka. Marka la xaqiijiyo baahinta ballaaran, waxay taageeraysaa ka qaybgalka muwaadiniinta, waxayna u oggolaanaysaa inay saameyn ku yeeshaan horumarinta dastuurka. Tani waxay kordhinaysaa kalsoonida iyo la-lahaanshaha nidaamka demoqraadiyadda.
	2) Guddiga Lasocodku waa inuu xaqiijiyaa in Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegsita iyo Higelinta Dastuurka uu qabtay ama latashiyada dadweyane iyo wacyigelin, si loo xaqiijiyo daahfurnaanta.	
	3) Aragtiyaha iyo soojeedinnada dadweynaha waa in la ururiyaa isla markaana loo gudbiyaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, iyaga oo ay weheliso talooyinka muhiimka ah.	

	<b>Qodobka 196aad: Hay'adda Culumada Soomaaliyeed</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	Dastuurkan wuxuu dhisayaa Hay'adda Culumada Soomaaliyeed oo ka kooban 9 xubnood oo uu magacaabayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa lagu faahfaahinayaa xilalka hay'addan iyo mudadda xilahayntiisa.	Qodobkan waxaa lagu dhisay Hay'adda Culumada Soomaaliyeed.
	<b>Qodobka 197aad: Xafiiska Garyaqaanka Guud</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	Dastuurkan wuxuu dhisayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, waxaana xeer gaar ah ku soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo qeexaya qaab-dhismeedka Garyaqaanka Guud, habraaca magacaabisa iyo xilkaqaadistiisa, xilkiisa iyo muddo xileedkiisa.	Qodobkan wuxuu qeexayaa dhismaha xafiiska garyaqaanka guud.
	<b>Qodobka 198aad: Mabaadi'da Guud ee Guddiyada Madaxabanaan</b>	<b>Qodob cusub.</b>
	<ol style="list-style-type: none"> <li>1) Guddiyada madaxbannaan ee lagu dhisay Dastuurkan waa hay'ad ka madaxbannaan xukuumadda ama xakamayn siyaasaded, awoodna u leh adeegsiga aqoontooda xirfadeed ee la xiriira hawlhooda u gaarka ah.</li> <li>2) Guddi madaxbannaan marka uu ku jiro gudashada waajibaadkiisa iyo hawlgalkiisa waa in ay ka muuqataa in uu ku shaqaynayo dareenka dhawrista xuquuqda Aadanaha, dimuqoraaddiyad iyo daah furnaan.</li> <li>3) Guddi madaxbannaan marna ma hoos imanayo, kamana amarqaadanyo qof ama hay'ad awood xukun leh midna.</li> <li>4) Guddiyada Madaxabannaan waxay yeelanayaan miisaaniyad u gaar ah oo ku jirta miisaaniyadda guud ee Dawladda.</li> </ol>	Qodobkan wuxuu xeerinayaa Mabaadi'da Guud ee Guddiyada Madaxabanaan ee lagu dhisay Dastuurkan,
<b>Qodobka 142aad: Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka ee Ka jira Soomaaliya</b>		<b>Qodobkan waa la tiray.</b>
(1) Ilaa inta laga gaarayo goorta dhammaan o Dastuurada dawladaha xubnaha ka ah		Qodobkan waa la tiray,

federaalka la waafajinyo Dastuurka Dawladda federaalk maamulada jira ka hor inta aan la qaadan Dastuurkan ku meel gaarka ahi waxa ay sii haysanayaan awoodaha Dastuurkoodu siinayo.		Maaddaama nuxurkiisa lagu nidaamiyay cutubka 5aad ee Dastuurka .
(2) Dawladaha xubinta ka ah dawladda Federaalku waa in lala tashadaa marka la qaadanayo go aanno la xiriira nidaamka federaalka, iyo qaabka nabadgalyada		
<b>Qodobka 143aad: Ka Noqoshada Axdiga Federaalka.</b>		<b>Qodobkan waa la tiray</b>
Axdiga Federaalka ee ku meel gaarka ahi waxa ay mudadiisu dhammaanaysaa marka lakala diro Golaha Ansixinta Dastuurka ee Qaranka		

Waxaa la tiray:

- Jadwalka Koowaad (C): Kala Guurka: Wax-kabeddelka Dastuurka ee soojeediyay xilliga Koowaad ee Baarlamaanka Federaalka.
- Jadwalka Koowaad (D): Shuruucda Mudnaanta Koowaad leh in la sameeyo Xilliga Koowaad ee Baarlamaanka Federaalka ah

